Qaybaha Iimaanka

Waxaa dhigay

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM

Tusmada Kitaabka

Mawduuca	Bogga
1. Qaybaha iimaanka oo qalbiga lagu meel mariyo	5
2. Qaybaha iimaanka oo carrabka lagu meel mariyo	5
3. Qaybaha iimaanka oo xubnaha jirka lagu fuliyo	6
4. Lixda tiir ee iimaanka	7
5. **Magacda Ilaahay ee Suusuuban\أسماء الله الحسنى: Koowaad**	7
6. **Rumaynta Malaa'igta Ilaahay: Tiirka Labaad**	11
7. Qalinka	13
8. Al Llawxu Al Maxfuuthu	21
9. Al Carshu	21
10. Xamalatu Al Carshi	21
11. Al Kursiyyu	24
12. Malaa'igta	24
13. Malaa'igta arzaaqda u xilsaaran	26
14. Malaa'igta qofka ilaalisa	26
15. Malaa'igta cunugga caloosha hooyadiis ekaanshihiisa samaysa	28
16. Malaa'igta badbaadinta cunugga caloosha ku jira u xilsaaran	29
17. Malaa'igta daruuraha u duwa meesha la amro	29
18. Malaa'igta dhigta dadka jimcaha masjidka yimaada	29
19. Malaa'igta jannada iyo naarta maamusha	30
20. Malaa'igta is daba marta	30
21. Malaa'igta "Aamiin" tiraahdaa	31
22. Malaa'igta tiraahda: "Rabbanaa wa laka al xamdu"	32
23. Malaa'igta u ducaysa qofka salaadda sugaya	32
24. Malaa'igta lacnadda haweenta ninkeedoo doonaya isu diida	32
25. Toddobada samo	33
26. Samada koowaad	33
27. Samada Labaad	36
28. Samada saddexaad	37
29. Samada afaraad	37
30. Samada shanaad	37
31. Samada lixaad	38
32. Samada toddobaad	39
33. Toddobada arli	39
34. **Rumaynta kutubbada Ilaahay: Tiirka Saddexaad**	40
35. **Rumaynta Rususha Ilaahay oo idil: Tiirka Afaraad**	41
36. **Rumaynta Maalinta Aakhiro: Tiirka Shanad**	44
37. **Rumaynta Qadarka khayrkiisa iyo sharkiisaba: T.Lixaad**	44

بسم الله الرحمن الرحيم

الحمد لله والثناء لله وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيراكلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون، أما بعد،

Suuratu Al Baqarah\سورة البقرة

Ilaahay Subxaanahu wa Tacaalaa**\الله سبحانه وتعالى** wuxuu Suuratu Al Baqarah**سورة البقرة** ku yiri:

بسم الله الرحمن الرحيم. الم (1) ذَلِكَ الْكِتَابُ لَا رَيْبَ فِيهِ هُدًى لِلْمُتَّقِينَ (2) الَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِالْغَيْبِ وَيُقِيمُونَ الصَّلَاةَ وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنْفِقُونَ (3) وَالَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِمَا أُنْزِلَ إِلَيْكَ وَمَا أُنْزِلَ مِنْ قَبْلِكَ وَبِالْآخِرَةِ هُمْ يُوقِنُونَ (4) أُولَئِكَ عَلَى هُدًى مِنْ رَبِّهِمْ وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ (5)

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Aliflaammiim(1) **Thaalika Al Kitaabu laa rayba fiihi hudan lil muttaqiina**(2)**Allathiina yu'minuuna bi al ghaybi wa yuqiimuuna al ssalaata wa mimmaa razaqnaahum yunfiquuna**(3)**Wa allathiina yu'minuuna bimaa unzila ilayka wa maa unzila min qablika wa bi al aakhirati hum yuuqinuuna**(4)**Uulaa'ika calaa hudan mmin Rabbihim wa uulaa'ika humu al muflixuuna**(5)**"**.
Aayadaha macnohoodu waxaa weeye:

" Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Aliflaammiim(1)Kitaabkaas Quraanka ah shaki kuma jiro inuu Ilaahay agtiisa ka yimid , uuna xaq run ah yahay. Quraankuna waxaa ugu sugan hanuun kuwa Ilaahay ka dhawrsada. Taqwana**التقوى** waxaa la yiraahdaa waxaad isaga dhigtid oo iska xijisid waxaad kahanayso sida naarta oo kale.

Calii bin Abii Dhaalib**علي بن أبي طالب**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"إذا اشتد البأس اتقينا برسول الله صلى الله عليه وسلم."

"Ithaa ishtadda al ba'su itqaynaa bi Rasuuli Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Markuu xarbigu kululaado oo gacanta la isula tago, ayaan waxaan cadawga isaga dhigi jirnay oo aan ayaga xijin jirnay oo aan annaga iyo ayaga dhexdeena yeeli jirnay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, annagoo gadaashiisa ku sugan."

Marka ninka muttaqiga ahi wuxuu cathaabta Ilaahay isaga dhigaa oo iska xijiyaa isagoo adeeca awaamirta Ilaahay, kana fogaada wuxuu ka reebay.

Cumar**عمر** ayaa wuxuu Kacb Al Axabaar**كعب الأحبار** ku yiri:
"Taqwada nooga warraan."
Markaasuu wuxuu yiri:

"Ma martay dariiq qodax leh?"
Wuxuu yiri:
"Haa."
Wuxuu yiri:
"Maxaad hadaba fashay?"
Wuxuu yiri:
"Waan is ilaaliyay oo aan maradana xaytay si ayan qodaxi iiga qabsan, aanna faraha fooddooda aayar ku socday."

Kacb bin Al Axbaar\كعب الأحبار wuxuu yiri:
"Taas weeye taqwadu."(1)Ilaahay ayaa noo tilmaamaya sifooyinkay leeyihiin muttaqiintum wuxuuna yiri:
"Waa kuwaa aamina oo rumeeya ghaybka oo ah waxaadan u jeedin oo aadan indhihaaga ku arki karin laguse amray inaad rumeysid inay jiraan oo run yihiin, sida Ilaahay Cazza wa Jalla **الله عز وجل\,** Malaa'igta, bacthiga, Jannada, Naarta, siraadka iyo miizaanka. Iimaan waxaa la yiraahdaa, xagga shareecada inaad qalbiga ka rumeysid, carrabkana aad ka qirtid, xubnahana aad ku meel marisid oo ku sameysid qaybaha iimaanka.

Qaybaha iimaanku ka kooban yahay

Imaam Muslim\مسلم الأمام wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri inuu iimaanku yahay:

"أن تؤمن بالله، وملائكته، وكتبه، ورسله، واليوم الآخر، وتؤمن بالقدر خيره وشره."

"An tu'mina biAllaahi, wa malaa'ikatihi, wa kutubihi, wa Rusulihi, wa al yawmi al aakhiri, wa tu'mina bi al qadri khayrihi wa sharrihi."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Iimaanku waa inaad rumaysid Ilaahay, iyo malaa'igtiisa, iyo kutubtiisa, iyo Rusushiisa, iyo maalinta aakhiro, iyo inaad rumaysid qadarka khayrkiisa iyo sharkiisaba."
Waana Xadiithka sideedaad ee Saxiixu Muslim\صحيح مسلم, markuu Jibriil\جبريل Calayhissalaamu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wareysanayo.

Al Bukhaarii\البخاري iyo Muslim\مسلم waxay wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"الإيمان بضع وسبعون، أو بضع وستون شعبة، أفضلها قول لا إله الا الله وأدناها إماطة الأذى عن الطريق. والحياء شعبة من الإيمان."

"Al iimaanu bidcun wa sabcuuna, aw bidcun wa sittuuna shucbatan, afdaluhaa qawlu laa ilaaha illaa Allaahu wa adnaahaa imaadhatu al athaa cani al dhariiqi. Wa al xayaa'u shucbatun mina al iimaani."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Iimaanku wuxuu ka kooban yahay dhawr iyo toddobaatan qaybood ay ugu sarreyso dhihidda laa ilaaha illaa Allaahu, ayana ugu hooseyso in dariiqa laga qaado waxa dadka dhibaya." Kanna waa lafdiga\لفظ Muslim\مسلم.

Kow: Qaybaha iimmanka Qalbiga lagu fuliyo waa afar iyo labaatan Qaybood

Kow. Rumaynta Ilaaha.
Labo. Rumaynta malaa'igtiisa.
Saddex. Rumaynta kutubtiisa.
Afar. Rumaynta Rusushiisa
Shan. Rumaynta Qadarka, khayrkiisa iyo sharkiisaba.
Lix. Rumaynta Maalinta Aakhiro iyo dhammaan waxa la xirira.
Toddoba. Jacaylka Ilaahay oo ah inaad adeecdo wuxuu ku faray, kana hartid wuxuu kaa reebay.
Sideed. Ilaahay daraadiis wax loo jeclaado, loona naco.
Sagaal. Jacaylka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.
Toban. Weyneynta Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo ku sallintiisaba.
Kow iyo toban. Ikhlaaska caqiidada iyo camalkaba iyo in is tustuska munaafaqnimada laga fogaado.
Labo iyo toban. In la tawbad keeno.
Saddex iyo toban.Ilaahay in laga cabsado.
Afar iyo toban. Rajaynta raxmada Ilaahay adduun iyo aakhiraba.
Shan iyo toban. Ku shukrinta Ilaahay, oo ah mahdcelintiisa iyo adeeciddiisa.
Lix iyo toban. Oofinta heshiiyada iyo ballanka.
Toddoba iyo toban. Sabirka, oo ah adkeysiga.
Sideed iyo toban. Xukunka Ilaahay oo raalli lagu noqdo.
Sagaal iyo toban. Ilaahay oo la talo saarto.
Labaatan. Dadka oo loo naxariisto.
Kow iyo labaatan. Isla weyni iyo kibir la'aanta.
Labo iyo labaatan. Xaasidnimada oo laga tago.
Saddex iyo labaatan. Nacaybka oo laga tago.
Afar iyo labaatan. Carada oo laga tago.

Labo: Qaybaha iimaanka carrabka lagu fuliyo waa Toddoba Qaybood

(Kow) Tawxiidka, oo ah shahaadada oo lagu dhawaaqo.
(Labo) Akhrinta Quraanka.
(Saddex) Barashada cilmiga.
(Afar) Baridda cilmiga.
(Shan) Alle bariga, oo ah ducaysiga.
(Lix) Thikriga, oo ah xusidda Ilaahay.
(Toddoba) Ka fogaanshaha ku hadlidda hadal aan waxtar lahayn, oo aadan ajar ku heleyn.

Saddex: Qaybaha iimaanka xubnaha jirka lagu meelmariyo waa sideed iyo soddon Qaybood

(Kow) Is daahirinta iyo najaasada oo laga fogaado.
(Labo) Asturidda ama qarinta cawrada.
(Saddex) Tukashada salaadda fardiga ah iyo midda sunnada ahba.
(Afar) Bixinta zakada.
(Shan) Xoraynta addoommada.
(Lix) Deeqsinnimada.
(Toddoba) Soomidda bisha soonqaad iyo soonka sunnada ahba.
(Sideed) Gudashada fardiga xajka.
(Sagaal) Gudashada Cumrada.
(Toban) Ku dawaafka Kacbada.
(Kow iyo toban) Masjid dhexdiisa oo lagu ictikaafo.
(Labo iyo toban) Baadi goobka laylatu Al Qadri.
(Saddex iyo toban) La cararidda Diinta daraadeed.
(Afar iyo toban) Oofinta natharka.
(Shan iyo toban) Ku dadaalidda kordhinta iimaanka.
(Lix iyo toban) Bixinta kafaaro gudyada.
(Toddoba iyo toban) Guursashada oo la isku ilaaliyo.
(Sideed iyo toban) Caruurta oo xaqqooda loo oofiyo.
(Sagaal iyo toban) Labada waalid oo baarri loo ahaado.
(Labaatan) Caruurtaada oo wax la baro, lana rabbeeyo oo la koriyo.
(Kow iyo labaatan) Riximkaaga oo la xiriiriyo, waana qaraabadaada.
(Labo iyo labaatan) Addoommadu inay kuwa leh u hoggan samaan, kuwaanna ay u turaan.
(Saddex iyo labaatan) Haddaad xil bulshadeed qaadid inaad caddaalad fashid.
(Afar iyo labaatan) Raacidda meeshay muslimiintu u badan yihiin.
(Shan iyo labaatan) Madaxda muslimiinta oo la adeeco.
(Lix iyo labaatan) Dadka is khilaafsan oo la heshiisiiyo.
(Toddoba iyo labaatan) Ku dhaqanka waxa suuban oo la iska kaashado.
(Sideed iyo labaatan) Xuduudda Ilaahay oo la oogo.
(Sagaal iyo labaatan) Jihaadka.
(Soddon) Amaanada oo la oofiyo.
(Kow iyo soddon) Dayn dadka la siiyo, lana gudo.
(Labo iyo soddon) Dariska oo la karaameeyo.
(Saddex iyo soddon) Dadka oo si suuban loola dhaqmo, ayna ka mid tahay maalka oo si xalaal ah loo kasbo, si xaq ahna lagu bixiyo.
(Afar iyo soddon) Qofka ku salaama oo isagana la salaamo.
(Shan iyo soddon) Qofka hindhisa oo loo duceeyo.
(Lix iyo soddon) Dadka in dhibkaaga laga reebo oo aadan dhibin.
(Toddoba iyo soddon) Cayaaraha oo laga fogaado.
(Sideed iyo soddon) Dariiqa oo waxa dadka dhiba laga qaado.

Lixda tiir ee iimaanka

Iimaanku wuxuu ka kooban yahay lix qaybood, sida ugu soo uruurtay axaadiithta saxiixa ah. Qaybahaasi waxay kala yihiin sida soo socota.

Tiirka koowaa rumaynta Ilaahay

Qaybta ugu horreysa iimanka waa inaad jiritaanka Ilaahay qiratid.

Magacda Ilaahay ee Suuban

Ilaahay wuxuu leeyahay sagaal iyo sagaashan Magac oo Suuban, uuna ugu horreeyo **ALLAAHU****الله**. Waxaa Abuu Hurayrah**أبو هريرة** wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

إن لله تسعة وتسعين إسما، مئأة إلا واحدا. من أحساها جخل الجنة. إنه وتر يحب الوتر"

"Inna Lillaahi tiscata wa tisciina isman, mi'atan illaa waaxidan. Man axsaahaa dakhala Al jannata. InnaHu Witrun yuxibbu al witra."
Xadiith macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay wuxuu leeyahay sagaashan iyo sagaal Magac, Boqol mid dhimman, mana jiro qof xifdiyah ee waa illaa kii Jaanada gala, Isaguna waa Witir**وتر**, Witirkuuna**وتر** jecelyahay"

Waana Xadiithka lix kun afar boqol iyo toban ee Fatxul Baari fii Saxiixil Bukhaari, **فتح الباري في شرح صحيح البخاري**\ Baabka sideed iyo lixdanaad.

Riwaayad kalena macneheedu waxaa weeyey: "Ilaahay wuxuu leeyahay sagaal iyo sagaashan Magac, qofkii xifthiyah Jannaduu gelayaa, Ilaahayna waa Witir, wuxuuna jecelyahay Witirka (Mid)".

Riwaayadda Ibnu Cumarna**إبن عمر** waxay leedahay:
"Qofkii wada akhriya jannaduu gelayaa".

Xifthiya waxaa weeye:
Kow. Qofka korka ka barta, ama
Labo. Inta kulligood akhriya, kaddib Ilaahay ku barya oo wediista wuxuu doonayo, ama
Saddex. Macnohhoda garta oo ku dhaqma, oo markuu wax u baahan yahay xusuusta inuu Ilaahay yahay Allaahu, Midka Rizqiga Bixiya, Midka dambiga Dhaafa, Midka Naxariista, iwm. Xadiithka laba kun lix boqol iyo toddoba iyo toddobaatan ee Saxiixu Muslim bi Sharxi Al Nawawii**صحيح مسلم بشرح النووي**.
(Kow) **Allaahu****الله**. (Labo) **Al Rraxmaanu****الرحمن**. (Saddex) **Al Rraxiimu****الرحيم**. (Afar) **Al Maliku****الملك**.(Shan) **Al Qudduusu****القدوس**. (Lix) **Al Ssalaamu****السلام**. (Toddoba) **Al Mu'minu****المؤمن**.(Sideed) **Al Muhayminu****المهيمن**.(Sagaal)**Al Caziizu****العزيز**.(Toban) **Al Jabbaaru****الجبار**.(Kow iyo toban) **Al Mutakabbiru****المتكبر**. (Labo iyo toban) **Al**

Khaaliqu\الخالق. (Saddex iyo toban) **Al Baari'u**\البارء. (Afar iyo toban) **Al Musawwiru**\المصور. (Shan iyo toban) **Al Ghaffaaru**\الغفار. (Lix iyo toban) **Al Qahhaaru**\القهار. (Toddoba iyo toban) **Al Ttawwaabu**\التواب . (Sideed iyo toban) **Al Wahhaabu**\الوهاب. (Sagaal iyo toban) **Al Khallaaqu**\الخلاق. (Labaatan) **Al Rrazzaaqu**\الرزاق. (Kow iyo labaatan) . **Al Fattaaxu**\الفتاح. (Labo iyo labaatan) **Al Caliimu**\العليم. (Saddex iyo labaatan) **Al Xaliimu**\الحليم. (Afar iyo labaatan) **Al Cathiimu**\العظيم. (Shan iyo labaatan) **Al Waasicu**\الواسع. (lix iyo labaatan) **Al Xakiimu**\الحكيم. (Toddoba iypo labaatan) **Al Xayyu**\الحي. (Sideed iyo labaatan) **Al Qayyuumu**\القيوم. (Sagaal iyo labaatan) **Al Ssamiicu**\السميع. (Soddon) **Al Basiiru**\البصير. (Kow iyo soddon) **Al Lladhiifu**\اللطيف. (Labo iyo soddon) **Al Khabiiru**\الخبير. (Saddex iyo soddon) **Al Caliyyu**\العلي. (Afar iyo soddon) **Al Kabiiru**\الكبير. (Shan iyo soddon) **Al Muxiidhu**\المحيط. (Lix iyo soddon) **Al Qadiiru**\القدير. (Toddoba iyo soddon) **Al Mawlaa**\المولى. (Sideed iyo soddon) **Al Nnasiiru**\النصير. (Sagaal iyo soddon) **Al Kariimu**\الكريم. (Afartan) **Al Rraqiibu**\الرقيب. (Kow iyo afartan) **Al Qariibu**\القريب. (Labo iyo afartan) **Al Mujiibu**\المديب. (Saddex iyo afartan) **Al Wakiilu**\الوكيل. (Afar iyo afartan) **Al Xasiibu**\الحسيب. (Shan iyo afartan) **Al Xafiithu**\الحفيظ. (lix iyo afartan) **Al Muqiitu**\المقيت. (Toddoba iyo afartan) **Al Waduudu**\الودود. (Sideed iyo afartan) **Al Majiidu**\المجيد. (Sagaal iyo afartan) **Al Waarithu**\الوارث. (Konton) **Al Sh-shahiidu**\الشهيد. (Kow iyo konton) **Al Waliyyu**\الولي. (Labo iyo konton) **Al Xamiidu**\الحميد. (Saddex iyo konton). **Al Xaqqu**\الحق. (Afar iyo konton) **Al Mubiinu**\المبين. (Shan iyo konton) **Al Qawiyyu**\القوي. (Lix iyo konton) **Al Matiinu**\المتين. (Toddoba iyo konton) **Al Ghaniyyu**\الغني. (Sideed iyo konton) **Al Maaliku**\المالك . (Sagaal iyo konton) **Al Sh-shadiidu**\الشديد. (Lixdan) **Al Qaadiru**\القادر. (Kow iyo lixdan) **Al Muqtadiru**\المقتدر. (Labo iyo lixdan) **Al Qaahiru**\القاهر. (Saddex iyo lixdan) **Al Kaafiyu**\الكافي. (Afar iyo lixdan) **Al Sh-shaakiru**\الشاكر. (Shan iyo lixdan) **Al Mustacaanu**\المستعان. (Lix iyo lixdan) **Al Faadhiru**\الفاطر. (Toddoba iyo lixdan) **Al Badiicu**\البديع. (Sideed iyo lixdan) **Al Ghaafiru**\الغافر. (Sagaal iyo lixdan) **Al Awwalu**\الأول. (Toddobaatan) **Al Aakhiru**\الآخر. (Kow iyo toddobaatan) **Al Th-thaahiru**\الظاهر. (Labo iyo toddobaatan) **Al Baadhinu**\الباطن. (Saddex iyo toddobaatan) **Al Kafiilu**\الكفيل. (Afar iyo toddobaatan) **Al Ghaalibu**\الغالب. (Shan iyo toddobaatan) **Al Xakamu**\الحكم. (Lix iyo toddobaatan) **Al Caalimu**\العالم. (Toddoba iyo toddobaatan) **Al Rrafiicu**\الرفيع . (Sideed iyo toddobaatan) **Al Xaafithu**\الحافظ. (Sagaal iyo toddobaatan) **Al Muntaqimu**\المنتقم . (Sideetan) **Al Qaa'imu**\القائم. (Kow iyo sideetan) **Al Muxyii**\المحيي. (Labo iyo sideetan) **Al Jaamicu**\الجامع. (Saddex iyo sideetan) **Al Maliiku**\المليك. (Afar iyo sideetan) **Al Mutacaalii** \المتعالي. (Shan iyo sideetan) **Al Nnuuru**\النور. (Lix iyo sideetan) **Al Haadii**\الهادي. (Toddoba iyo sideetan) **Al Ghafuuru**\الغفور. (Sideed iyo sideetan) **Al Sh-shakuuru**\الشكور. (Sagaal iyo sideetan) **Al Cafuwwu**\العفو. (Sagaashan) **Al Rra'uufu**\الرءوف. (Kow iyo sagaashan) **Al Akramu**\الأكرم . (labo iyo sagaashan) **Al Aclaa**\الأعلى. (Saddex iyo sagaashan) **Al Barru**\البر. (Afar iyo sagaashan) **Al Xafiyyu**\الحفي. (Shan iyo sagaashan) **Al Rrabbu**\الرب. (Lix iyo

sagaashan) **Al Ilaahu**\الإله. (Toddoba iyo sagaashan) **Al Waaxidu**\الواحد. (Sideed iyo sagaashan) **Al Axadu**\الأحد . (Sagaal iyo sagaashan) **Assamadu Allathii lam Yalid wa lam Yuulad wa lam Yakun lahu kufuwan Axad** \الصمد الذي لم يلد و لم يولد ولم يكن له كفوا أحد."

Waxaa jira waraaqo badan oo sagaal iyo sagaashan magac oo magacda Ilaahay ka mid ahi ku dhigan yihiin. Magacdaan aan halkaan ku soo xusnay wanaagga u gaarka ahi waxaa weeye inay dhammaantood Quraanka Kariimka ahi ku jiraan, siduu Ibnu Xajar**إبن حجر** Fatxu Al Baariga **فتح الباري**\ ugu wariyay. Allaha nagu anfaco.

Magacdaas Suusuuban macnohoodu waxaa weeye:

Kow. **Allaahu**\الله. Labo. **Al Rraxmaanu**الرحمن : Midka Naxariista guud naxariista. Saddex\. **Al Rraxiimu**الرحيم : Midka Naxariista gaarka ah muslimiinta u naxariista. Afar. **Al Maliku**\الملك **:** Boqorka runta ah. Shan. **Al Qudduusu**القدوس : Al Qudduus oo ah Midka Daahirka ah. Lix. **Al Ssalaamu**السلام : Nabad geliye. Toddoba. **Al Mu'minu**\المؤمن **:** Midka mu'miniinta cathaabtiisa ka nabad geliya. Sideed. **Al Muhayminu**المهيمن : Midka khalqigiisa dusha ka ilaaliya oo acmaashooda u jeeda. Sagaal. **Al Caziizu**العزيز : Midka lagama adkaadaha ah. Toban. **Al Jabbaaru**\الجبار **:** Cathiimka wayn ah. Kow ito toban. **Al Mutakabbiru**المتكبر : Midka axad kasta oo kale iskala weyn. Labo iyo toban. **Al Khaaliqu**\الخالق **:** Midka wax abuura oo qadara. Saddex iyo toban. **Al Baari'u**البارئ : Midka waxaan hore u jirin abuura oo ahaysiiya. Afar iyo toban. **Al Musawwiru**\المصور **:** Midka suuradeeya addoommadiisa iyo waxay ku kala duwan yihiin. Shan iyo toban. **Al Ghaffaaru**الغفار : Midka dambi dhaafka badan. Lix iyo toban. **Al Qahhaaru**القهار : Midka wax walba ka adag oo qahra. Toddoba iyo toban. **Al Ttawwaabu** التواب : Midka tawbad aqbalka badan. Sideed iyo toban. **Al Wahhaabu**\الوهاب **:** Midka wax badan hibeeya. Sagaal iyo toban. **Al Khallaaqu**الخلاق : Midka khalqiga dabadiisba abuura khalqi kale. Labaatan. **Al Rrazzaaqu**الرزاق : Midka rizqiga bixiya. Kow iyo labaatan. **Al Fattaaxu**الفتاح : Midka khalqiga kala xukuma. Labo iyo labaatan. **Al Caliimu**العليم : Midka wax walba cilmi u leh. Saddex iyo labaatan **Al Xaliimu**الحليم : Midka turidda badan. Afar iyo labaatan. **Al Cathiimu**العظيم : Midka wayn oo wax ka wayni ayan jirin. Shan iyo labaatan. **Al Waasicu**\الواسع **:** Midka waasaca deeqsiga ah. Lix iyo labaatan. **Al Xakiimu**الحكيم : Midka xikmada miiran ah. Toddoba iyo labaatan. **Al Xayyu**الحي : Midka nool oo daa'im ah oo weligiis noolaanaya oo aan dhimanayn. Sideed iyo labaatan. **Al Qayyuumu**القيوم : Midka wax maamula oo umuuraha oo idil u quma. Sagaal iyo labaatan. **Al Ssamiicu**\السميع **:** Midka wax walba maqla. Soddon. **Al Basiiru**البصير : Midka wax walba u jeeda. Kow iyo soddon. **Al Lladhiifu**اللطيف : Midka addoommadiisa u jilicsan. Labo iyo soddon. **Al Khabiiru**الخبير : Midka xoog ogaalka ah oo addoommadiisa ka warqaba. Saddex iyo soddon. **Al Caliyyu**العلي : Midka addoommadiisa oo idil ka sarreeya. Afar iyo soddon. **Al Kabiiru**الكبير : Midka wayn. Shan iyo soddon. **Al Muxiidhu**المحيط : Midka wax walba hareereeya oo ogsoon. Lix iyo soddon. **Al Qadiiru**القدير : Midka awoodda leh, wax walbana kara. Toddoba iyo soddon. **Al**

Mawlaaالمولى : Midka Gargaaraha, hiilliya ah. Sideed iyo soddon. **Al Nnaşiiru**النصير : Midka wax taakuleeya oo libta bixiya. Sagaal iyo soddon. **Al Kariimu**الكريم : Midka deeqsiga ah. Afartan. **Al Rraqiibu**الرقيب : Midka ilaaliyaha ah oo wax walba u jeeda. Kow iyo afartan. **Al Qariibu**\القريب **:** Midka mu'miniinta u dhow. Labo iyo afartan. **Al Mujiibu**المديب : Midka ducada aqbala, ahna waxa la weydiisto. Saddex iyo afartan. **Al Wakiilu**الوكيل : Midka umuurta loo wakiisho oo la talo saarto. Afar iyo afartan. **Al Xasiibu**الحسيب : Midka addoomaadiisa xisaabiya, abaal mariyana. Shan iyo afartan. **Al Xafiithu**الحفيظ : Midka acmaasha xafida, kana abaal mariya. Lix iyo afartan. **Al Muqiitu**\المقيت **:** Midka khalqigiisa quudiya, qof walbana siiya intuu u qadaray. Toddoba iyo afartan. **Al Waduudu**الودود : Midka mu'miniinta jecel, ayaguna ay jecel yihiin. Sideed iyo afartan. **Al Majiidu**المجيد : Midka Kariimka ah, Deeqsiga, sharftana leh. Sagaal iyo afartan. **Al Waarithu**الوارث : Midka wax walba dhaxla, oo markay khalqigiisu dhintaan Isagaa haraya. Konton. **Al Sh-shahiidu**الشهيد : Midka Shaahidka ah, oo goob joogga ah. Kow iyo konton. **Al Waliyyu**الولي : Midka la magan galo oo arrimaha dadka maamula oo u gargaara. Labo iyo konto. **Al Xamiidu**الحميد :Midka falkiisa lagu xamdiyo, oo la mahdiyo. Saddex iyo konton. **Al Xaqqu**الحق : Midka runta ah oo Ilaaha runta ah ah. Afar iyo konton. **Al Mubiinu**المبين : Midka xaqqa caddeeya. Shan iyo konton. **Al Qawiyyu**\القوي **:** Midka xoogga badan oo axad kasta ka xoog badan. Lix iyo konton. **Al Matiinu**المتين : Midka xoogga iyo Qudrada ku xeel dheer. Toddoba iyo konton. **Al Ghaniyyu**الغني : Midka hodanka ah oo aan waxba u baahnayn. Sideed iyo konton. **Al Maaliku**المالك : Midka hantay, oo ah Boqorka addoomihiisa iyo wixii sheegta. Sagaal iyo konton. **Al Sh-shadiidu**الشديد : Midka adag oo xoogga badan. Lixdan. **Al Qaadiru**\القادر **:** Midka wax walba kara. Kow iyo lixdan. **Al Muqtadiru**المقتدر : Midka wuxuu doono awooda oo meel marin kara. Labo iyo lixdan. **Al Qaahiru**القاهر :Midka wax qahra oo qof walbana ka korreeya. Saddex iyo lixdan. **Al Kaafiyu**الكافي : Midka kaafiya, oo ku filan wakiilnimada. Afar iyo lixdan. **Al Sh-shaakiru**الشاكر : Midka addoommadiisa cilmiga uu u leeyahay ku abaal mariya. Shan iyo lixdan. **Al Mustacaanu**المستعان : Midka la kaalmaysto. Lix iyo lixdan. **Al Faadhiru**الفاطر : Midka abuura oo hindisa adduunka. Toddoba iyo lixdan. **Al Badiicu**\البديع **:** Midka Abuura wuxuu doono isagoon ka fiirsanaynin nashqad horay u jirtay. Sideed iyo lixdan. **Al Ghaafiru**الغافر : Midka Danbiga dhaafa oo daboola. Sagaal iyo lixdan. **Al Awwalu**الأول : Midka Koowaad oo isagaa weligiis jiri jiray. Toddobaatan. **Al Aakhiru**الآخر : Midka markay wax walba halaagmaan jiri doona oo haraya. Kow iyo toddobaatan. **Al Th-thaahiru**الظاهر : Midka wax walba ka adag oo ka koreeya. Labo iyo toddobaatan. **Al Baadhinu**الباطن : Midka wax walba cilmi u leh. Saddex iyo toddobaatan. **Al Kafiilu**الكفيل : Midka marag u ah oofinta iyo damiintaba. Afar iyo toddobaatan. **Al Ghaalibu**الغالب : Midka adkaada oo wuxuu rabo meelmaria. Shan iyo toddobaatan. **Al Xakamu**الحكم : Midka Xaakim ah. Lix iyo toddobaatan. **Al Caalimu**العالم : Midka wax walba ogsoon oo ayan waxna ka qarsanayn. Toddoba iyo toddobaatan. **Al Rrafiicu**الرفيع ; Midka Darajooyinka Anbiyada iyo Rususha kor ka yeela.

Sideed iyo toddobaatan. **Al Xaafithu**الحافظ : Midka ugu khayrka badan inta wax xifdisa. Sagaal iyo toddobaatan. **Al Muntaqimu**المنتقم : Midka aargoosta. Sideetan. **Al Qaa'imu**القائم : Midka u taagan oo u quma maamulida khalqigiisa. Kow iyo sideetan. **Al Muxyii**المحيي : Midka soo nooleeya waxa dhintay. Labo iyo sideetan. **Al Jaamicu**\الجامع **:** Midka kulmiya kuwii hore iyo kuwa dambe. Saddex iyo sideetan. **Al Maliiku**الملیك : Midka ah Boqor awood leh. Afar iyo sideetan. **Al Mutacaalii**\المتعالي **:** Midka shay kasta uga kormaray qudradiisa, waa kartidiisee. Shan iyo sideetan. **Al Nnuuru**النور : Midka Nuurka ah. Lix iyo sideetan. **Al Haadii**الهادي : Midka Tawxiidka ku hanuuniya cidduu doono. Toddoba iyo sideetan. **Al Ghafuuru**الغفور : Midka danbi dhaafida ku xeel dheer. Sideed iyo sideetan. **Al Sh-shakuuru**الشكور : Midka adoomihiisa camalkooda yar raali ka noqda. Sagaal iyo sideetan. **Al Cafuwwu**العفو : Midka danbiyada mu'miniinta cafiya. Sagaashan. **Al Rra'uufu**الرءوف : Midka ah Naxariiste, addoommadiisana u tura. Kow iyo sagaashan. **Al Akramu**الأكرم : Midka u dul qaata jahliga adoomadiisa. Labo iyo sagaashan. **Al Aclaa**الأعلى : Midka sareeya oo koreeya. Saddex iyo sagaashan. **Al Barru**البر : Midka Al Llatiifu ah, addoommadiisa u ujilicsan, una naxariista. Afar iyo sagaashan. **Al Xafiyyu**الحفي : Midka adoomadiisa u tura oo ducadooda aqbala. Shan iyo sagaashan. **Al Rrabbu**الرب : Midka iska leh oo koriya adoomadiisa. Lix iyo sagaashan. **Al Ilaahu**الإله : Ilaah. Toddoba iyo sagaashan. **Al Waaxidu**الواحد : Midka Mid kali ah. Sideed iyo sagaashan. **Al Axadu** الأحد : Midka kaliga ah. Sagaal iyo sagaashan. **Assamadu Allathii lam Yalid wa lam Yuulad wa lam Yakun lahu kufuwan Axad** الصمد الذي لم يلد و لم يولد ولم يكن له كفوا أحد\Midka loo soo qasdo, Midka aan wax dhalin, Isagana aan la dhalin, Axad isaga u dhigma oo lamid ahna uusan jirin Cazza Wa Jalla."

Tiirka labaad waa rumaynta Malaa'igta

Tiirka labaad ee iimaanku waa inaad rumaysid Malaa'igta. Malaa'igta qaar ka mid ah ayaa magacdooda Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa\الله سبحانه وتعالى, Quraanka noogu sheegay, sida Jibriil**جبريل,** Miikaala**ميكال,** Maalik**مالك,** Raqiib**رقيب,** Catiid**عتيد.**

Malaa'igtu waa fara badan tahay, annaguna ma arki karno, ayaguse waa na arkaan, tiradoodana Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa**الله سبحانه وتعالى**, keli ah ayaa og. Malaa'igtu awaamirta Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa**الله سبحانه وتعالى**, ayay fuliyaan, amarkiisana ma diidaan, cunno ma cunaan, isma guursdaan oo caruurna ma dhalaan, waxaana laga abuuray Nuur.

Xadiithka Jaabir bin Cabdu Allaahi Al Ansaarii\جابر بن عبد الله الأنصاري

Al Zarqaanii**الزرقاني** wuxuu wariyay Axaadiithta soo socota ee ku saabsan siduu abuuritaanku u kala horreeyey iyo siduu Nuurka Nabigeennu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aakihi Wa Sallam ahaa waxa ugu horreeyey oo uu Ilaahay abuuray, nuurkaasna uu ka abuuray waxa jira, ayna malaa'igtu ka mid yihiin, wuxuuna yiri:
Wuxuu Cabdu Al Razzaaq bin Humaam bin Naafic Al Ximyarii**عبد الرزاق بن همام بن نافع الحميري**, caalinka ka wariyay Macmar**معمر** iyo Ibnu Jariij**إبن جريج** iyo Maalik**مالك** iyo labada Sufyaan**سفيان**

iyo Al Awzaacii\الأوزاعي iyo khalqi kaloo badan, isagana ay ka wariyeen Axmad\أحمد iyo Isxaaq\إسحاق iyo ghayrkoodba, kuna dhintay sanadka laba boqol iyo kow toban Hijriga Baghdaad \بغداد isagoo shan iyo sideetan jir ah, kitaabkiisa iyo sanad uu isagu leeyahay uga wariyay Jaabir bin Cabdu Allaahi bin Camr bin Xaraam Al Ansaarii Al Khazrajii **جابر بن عبد الله بن عمرو بن حرام الأنصاري الخزرجي**\, saxaabiga uu dhalay saxaabi kale, kana qayb galay sagaal iyo toban duullaan (waana ghazwah\غزوة: duullaanka hadduu hoggaaminayo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa la yirahdaa Ghazwah**غزوة**, hadday saxaabiyyin keli ah yihiin Sariyyah**سرية**), kuna dhintay Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة** kaddib sanadka Hijrada ee toddobaatanaad isagoo kow iyo sagaashan jir ah, wuxuuna yiri:
"Waxaan iri:
"Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan kugu furanayaa aabahay iyo hooyadey, ii sheeg waxa ugu horreeyey oo uu Ilaahay Tacaalaa abuuray ka hor ashayaa'da (waa waxa jira) oo idil."

Wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"يا جابر، إن الله تعالى، قد خلق قبل الأشياء نور نبيك من نوره، فجعل من ذلك النور يدور بالقدرة حيث شاء الله. ولم يكن في ذلك الوقت لوح و لا قلم و لا جنة و لا نار و لا ملك و لا سماء، و لا أرض، و لا شمس, و لا قمر، و لا جني و لا إنسي. فلما أراد الله أن يخلق قسم ذلك النور أربعة أجزاء: (1) فخلق من الجزء الأول: (1) القلم؛ (2) و من الثاني اللوح؛ (3) و من الثالث العرش.
ثم قسم الجزء الرابع أربعة أجزاء: (1) فخلق من الأول حملة العرش؛ (2) و من الثاني الكرسي؛ (3) و ما الثالث باقي الملائكة.
ثم قسم الرابع أربعة أجزاء: (1) فخلق من الأول السماوات السبع؛ (2) و من الثاني الأرضين؛ (3) و من الثالث الجنة و النار.
ثم قسم الرابع أربعة أجزاء: (1) فخلق من الأول نور أبصار المؤمنين؛ (2) و من الثاني نور قلوبهم و هي المعرفة بالله؛ (3) و من الثالث نور أنسهم و هو التوحيد لا إله إلا الله محمد رسول الله."

"Yaa Jaabiru, inna Allaaha Tacaalaa, qad khalaqa qabla al ashyaa'a nuura Nabiyyika min NuuriHi, fa jacala min thaalika al nuuri yaduuru bi al Qudrati xaythu shaa'a Allaahu. Wa lam yakun fii thaalika al waqti Lawxun wa laa Qalamun wa laa jannatun wa laa Naarun wa laa Malakun wa laa Samaa'a, wa laa arda, wa laa shamsun, wa laa qamarun, wa laa Jinniyyun wa laa Insiyyun. Fa lammaa araada Allaahu an yakhluqa qassama thaalika al nuura arbacata ajzaa'in: 1. Fa khalaqa mina al juz'i al awwali Al Qalama, 2. Wa mina al th-thaanii Al Lawxa 3. Wa min al th-thaalithi Al Carsha.
Thumma qassama al juz'a al raabica arbacata ajzaa'in: (1) Fa khalaqa mina al awwali Xamala Al Carshi (2) Wa mina al thaanii Al Kursiyya (3) Wa mina al thaalithi baaqiya Al Malaa'ikati. Thumma qassama al rraabica arbacata ajzaa'in: (1) Fa khalaqa mina al awwali Al Samaawaati Al Sabca, (2) Wa mina al th-thaanii Al Ardiina, (3) Wa mina al th-thaalithi Al Jannah wa Al Nnaara. Thumma qassama al rraabica arbacata ajzaa'in: (1) Fa khalaqa mina al awwali Nuura Absaara Al Mu'miniina (2) Wa mina al th-thaanii Nuura Quluubihim wa hiya al macrifatu bi Allaahi (3) Wa mina al th-thaalithi Nuura unisihim wa huwa Al Tawxiidu Laa ilaaha illaa Allaahu Muxammadun Rasuulu Allaahi. "
Xadiithkaan oo uu Al Bayhaqiina**البيهقي** wariyay isagoo erayadiisu qaar ka duwanyihiin, macnihiisu waxaa eeye:

"Jaabirow**جابر**, Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى**, wuxuu abuuray intuusan shay kale abuurin ka hor, Nuurka Nabigaaga, uuna ka abuuray Isaga Nuurkiisa oo uu Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** nuurkaas Isaga Laftiisa u nisbeeyey sharfid uu Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku sharfayo iyo inuu Nabigu yahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, khalqi cajiib ah, siduu Aayadda sagaalaad ee Suuratu Al Sajdah**سورة اسجدة** uu ruuxa uu Aadam**آدم** geliyay uu Isaga laftiisa ugu nisbeeyey oo kale, uuna yiri:

ثُمَّ سَوَّاهُ وَنَفَخَ فِيهِ مِنْ رُوحِهِ

"Thumma sawwaahu wa nafakha fiihi min ruuxihi"
oo macneheedu yahay "

Markaasuu ekeeyey oo uu ruuxiisa ku afuufay". Markaasuu Ilaahay nuurkaas ka yeelay mid ku wareegsada Qudradda Ilaahay meeshuu doono. Waqtigaasna ma jirin Lawxul Maxfuuthka **اللوح المحفوظ**\, Qalinkuna**القلم** ma jirin, Jannana ma jirin, Naarna ma ayan jirin, kuwaasoo markaas kaddib la abuuray, ayadoo hadana Jannada la abuuray intaan Naarta la abuurin ka hor, siduu Abuu Al Shaykhi**أبو الشيخ** Ibnu Cabbaas**إبن عباس** uga wariyay; Malaa'igna ma jirin, Samana ma jirin, arlina ma jirin, qorraxna ma jirin, dayaxna ma jirin, Jinnina ma jirin, Insina ma jirin. Markaasaa markuu Ilaahay doonay inuu khalqiga abuuro, ayuu nuurkaas wuxuu ku ziyaadiyay oo uu ku daray afar qaybood**:**

Q a l i n k a\القلم

(**Kow**) Qaybta koowaad wuxuu ka abuuray **Qalinka\القلم** oo sidaasuu Qalinku nuur uga samaysan yahay, sida Axaadiith kalena kusoo aroortay, sida Xadiithka Ibnu Cabbaas**إبن عباس** oo yiri inuu Nabig, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"قلمه نور."

"Qalamuhu nuurun",
oo macneheedu yahay:

"Qalinkiisu waa nuur".

Abuu Al Shaykhna**أبو الشيخ** wuxuu Mujaahid**مجاهد** ka wariyay inuu yiri:
"Waxa ugu horreeyey oo, uu Ilaahay abuuray waa xabbad luul ah oo sida qasabka u dheer dhexdana ka duleesha. Markaasuu xabbaddaas luulka ah wuxuu ka abuuray Qalinka**القلم** oo uu markaas ku yiri:

"أكتب ما يكون إلى يوم القيامة."

"Uktub maa yakuunu ilaa Yawmi Al Qiyaamati",
oo macneheedu yahay:

"Dhig waxa ahaan doona ilaa Maalinta Qiyaame."

Hadday sidaas tahay, waxaa dhici karta inuu nuurkaas u yeelay jir tayada ama sifada xabbad luul ah leh. Haddayan sidaas ahaynna waxaa la qaadanayaa Xadiithka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la xiriirsan oo ah "Qalinkiisu waa nuur**قلمه نور** ".

Qalinka dhererkiisu waa shan boqol oo sano (oo intaasoo sano ayaa labadiisa daraf loo kala safrayaa), siduu Abuu Al Shaykh**أبو الشيخ** Cabdu Allaahi bin Cumar**عبد الله بن عمر** uga wariyay.
Wuxuu kaloo Abuu Al Shaykhi**أبو الشيخ** sanad uu isagu leeyahay ku wariyay Xadiith oranaya inuu balliciisuna, sidaasoo kale shan boqol oo sano yahay, iyo inuu iliggiisu dhanbalan yahay, ayna midaada ama khaddu kasoo burqaneyso. Xadiithkaani ka hor imaan mayo oo is diidi mayaan midka kale oo, mursalka ah (Mursal waa Xadiith uu Taabici Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyay, oo uusan saxaabi u dhexeyn siday ahayd inay ahaato, isagoo uusan Taabici Nabiga, Sallaa Allaahi Calayhi Wasallam, suxbo lahayn) oranayana inuu Qalinku Luul ka samaysan yahay, dhererkiisuna toddoba boqol oo sano yahay, ayadoo waxa wax yar lagu tilmaamayaa (sida shan boqol oo sano oo toddoba boqol ka yar) ayan diidayn inuu ka badan yahay, iyo in luul lagu tilmaamay macneheedu waxaa weeye in xoogga nuurka iyo caddaantiisa luul loo ekeysiiyey oo lagu tilmaamay.

Waxaa la isku khilaafay jawaabta laga bixinayo su'aasha. ah:
"Ma Qalinkaa ah waxa ugu horreeyey oo la abuuro Nuurka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kaddib?"

Al xaafith, al callaamah Shaykhu Al Islaami Al Xasan bin Axmad **الحافظ العلامة شيخ الإسلام الحسن بن أحمد**\, kuna xeel dheeraaday fanan kala duwan ee culuumta Diinta, kana muuqday xufaadda casrigiisa, aanna Suldaannada u tegi jirin, maal iyo wax kalena aan ka aqbali jirin, Ilaahayna aan mid wax eedeeya uga baqayn oo, mar walba xaqqa ku kici jiray, dhintayna sanadka Hijriga ee shan boqol iyo sagaal iyo lixdanka,wuxuu yiri:
"Waxaa sax ah oo ay culummada intooda badani qabaan in Carshiga**العرش** la abuuray Qalinka**القلم** ka hor, sida ku sugnaatay Saxiix Muslim**صحيح مسلم** oo ka wariyay Cabdu Allaahi bin Camr bin Al Caasii**عبد الله بن عمرو بن العاصي** inuu yiri:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"إن الله قدر مقادير الخلق قبل أن يخلق السماوات و الأرض بخمسين ألف سنة و كان عرشه على الماء."

"Inna Allaaha qaddara maqaadiira al khalqi qabla an yakhluqa Al Samaawaata wa al arda bi khamsiina alfi sanatin wa kaana Carshuhu calaa al maa'i."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay wuxuu qadaray maqaadiirta khalqiga ka hor intuusan abuurin Samaawaatka iyo arliga konton kun oo sano, Carshigiisuna**العرش** wuxuu ahaa biyo korkood."

Midkaani waa Xadiith cad oo tusaya inay taqdiirtu ahaatay kaddib abuuridda Carshiga**العرش** iyo inay Taqdiirta maqaadiirta khalqiga ay ahaatay bilowga. marka Qalinka**القلم** la buuray, siduu u wariyay Xadiithka Cubaadatu bin Al Saamit bin Qays Al Ansaarii Al Khazrajii **عبادة بن الصامت بن قيس الأنصاري الخزرجي**, Abuu Al Waliid Al Madanii, Al Naqiibu**أبو الوليد المدني، النقيب** oo labo iyo tobanka Nuqabaa'**النقباء** ee Baycatu Al Caqabada**بيعة العقبة** labaad ka mid ahaa, Badrigana**بدري** ahaa oo duullaanka Badar**بدر** ka qayb galay oo goob joogga ahaa, ahaana nin aad u dheer, aadna u jir wayn, aadna u qurux badan, aadna u madow, aadna u khayr badan oo faadil ahaa, uuna

Cumar bin Al Khadh-dhaab**عمر بن الخطاب**, Allaha raalli ka noqdee, Shaam**الشام** u diray Qaalli **قاضي** ahaan iyo Macallin Quraan ahaan, oo sidaas ku ahaa Macallinka Quraanka ugu horreeyey ee arliga Shaam**الشام** , degeyna magaalada Xoms**حمس** ee dalka Siiriya**سوريا**, kaddibna wuxuu u guuray Falasdhiin**فلسطين**, ayaduuna ku dhintay sanadka afar iyo soddonaad ee Hijrada, waxaana lagu duugay Baytu Al Maqdis**بيت المقدس**.

Cubaadah**عبادة** wuxuu ka mid ahaa ragga dalka Masar**مصر** furay, wuxuuna madax u ahaa tobanka nin oo uu Camr bin Al Caasii**عمرو بن العاصي** u diray Boqorka Masar**مصر** si uu ula galo waanwaanta iyo shuruudaha ay Muslimiinta isugu dhiibi lahaayeen.
Cubaadah bin Al Saamit**عبادة بن الصامت** wuxuu wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"أول ما خلق الله القلم، قال له: "أكتب." قال: "وما أكتب؟" قال: "أكتب مقادير كل شيئ."

"Awwala maa khalaqa Allaahu Al Qalama, qaala lahu: "aktub." Qaala: Rabbi wa maa aktubu? Qaala: "Aktub maqaadiira kulla shay'in."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxa ugu horreeyey oo uu Ilaahay abuuray Carshiga kaddib waa Qalinka, markaasuu ku yiri: "Dhig."
Markaasuu Qalinku yiri, ayadoo uu Ilaahay Qalinka ku abuuray xoog iyo awood uu ku hadlo, siduu xubnaha ugu abuuray si la mid ah, siduu ugu abuuray inuu axad jeclaado ghayrkiisna uu naco, iyo waxyaalo kaleba:
"Rabbiyow maxaan dhigaa?"
Wuxuu yiri:
"Dhig maqaadiirta shay kulligiis" oo ah, waxa ahaan doona intuu adduunkaani ka go'ayo, oo ayan nicmooyinka Aakhiro, ee Jannad iyo cathaabta Aakhiraba, kuwaasoo aan go'ayn oo waaraya.

Waxaana sii caddeeyey inay sidaas tahay Xadiithka Abuu Daauud**أبو داود** oo ay erayadiisu yihiin:

"أكتب مقادير كل شيئ حتى تقوم الساعة."

"Uktub maqaadira kulla sha'in xattaa taquuma Al Saacatu",
oo macnihiisu yahay:

"Waxaad dhigtaa maqaadiirta shay kulligiis ilaa ay Saacaddu ka istaageyso."
Waxaana wariyay Axmad**أحمد** oo erayadaas ku wariyay.

Al Tarmathii**الترمذي** wuxuu Xadiithkaan u wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"أن أول ما خلق الله القلم، فقال له: "أكتب." قال: "وما أكتب؟" قال: "أكتب مقادير كل شيئ، حتى تقوم الساعة". من مات على غير هذا فليس مني."

"Anna awwala maa khalaqa Allaahu Al Qalama, fa qaala lahu: "Uktub" Qaala: "Wa maa aktubu?" Qaala: "Uktub maqaadiira kulla shay'in, xattaa taquumu Al Ssaacatu. Man maata calaa ghayri haathaa fa laysa minnii. "

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"In waxa ugu horreeya oo uu Ilaahay abuuray waa Qalinka, markaasuu ku yiri:
"Dhig".
Wuxuu yiri:
"Maxaanna dhigaa?"
Markaasuu wuxuu ku yiri:
"Waxaad dhigtaa maqaadiirta wax walba oo ahaanaya ilaa ay Saacaddu ka kacdo. Qofka midkaan mid aan ahayn isagoo ku sugan dhintana aniga igama mid aha."

Waxaa halkaas ka cad oo Xadiithkaan loo daliilsan karaa inay taqdiirtu dhacday bilowga marka Qalinka la abuurayba, ayadoo ay suurta gal tahay inuu macnuhu yahay oo uu Ilaahay Tabaaraka wa Tacaala\الله تبارك و تعالى ku yiri Qalinka:

"أكتب مقادير كل شيئ من الأشياء التي قدرتها قبله."

"Uktub maqaadiira kulli shay'in mina al ashyaa'i allatii qadartuhaa qablu", oo macneheedu yahay:

"Dhig maqaadiirta wax walba oo ka mid ah waxaan hore u qadaray."

Waxaa ayaduna dhici karta inuu muraadku yahay:

"أكتب مقادير الأشياء التي قد أبررت تقديرها في الوجود الخارجي."

"Uktub maqaadiira al ashyaa'i allatii qad abrartu taqdiirahaa fii al wujuudi al khaariiji", oo macnheedu yahay:

"Waxaad dhigtaa maqaadiirta ashyaa'da aan ku muujiyay taqdiirtooda jiritaanka loo jeedo", in kastoo ay Cilmigiisa, Tabaaraka wa Tacaalaa\تبارك وتعالى, ku qadarnaayeen azalka aan bilowga lahayn.

Waxay kaloo Imaam Axmad\أحمد الأمام iyo Al Tarmathii\الترمذي wariyeen oo uu midkaan dambena saxiix ka dhigay Xadiithka uu wariyay Abii Raazin Laqiidh bin Caamir Al Cuqaylii إبي رازن لقيط بن عامر العقيلي, oo loo nisbeeyey Cuqayl bin Kacb\عقيل بن كعب oo ah saxaabiga la yaqaanno, oo yiri inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إن الماء خلق قبل العرش."

"Inna al maa'a khuliqa qabla Al Carshi",
oo macneheedu yahay:

"Biyaha waxaa la abuuray Carshiga hortiis", Xadiithkaanoo caddaynaya inuusan Qalinku ahayn waxa ugu horreeya oo la abuuray, ayadoo biyaha la abuuray Carshiga hortiis, oo la abuuray Qalinka hortiis. Wuxuu kaloo Ismaaciil Cabdu Al Rraxmaanu Al Suddiyyu إسماعيل عبد الرحمن السدي\, mufassirka caanka ah, Anas bin Maalik\أنس بن مالك iyo Ibnu Cabbaas\إبن عباس ka wariyay, isagana ay ka wariyeen Shucbah\شعبة iyo Al Thawrii\الثوري, Ibnu Maciinna\إبن معين uu

yiri waa taag daran yahay, Imaam Axmadna\الأمام أحمد uu kalsooni siiyay oo uu yiri waa Thiqqah\ثقة, Muslim-na\مسلم uu xujjo ka dhigtay, "Al Taqriibu\التقريب" kitaabka la yiraahdana uu yiri waa runlow, mararka qaarkoodna shiicada gala, dhintayna sanadka Hijriga ah ee boqol iyo toddoba iyo labaatan, ayna ka wariyeen Jamaacada intaan Bukhaarii\البخاري ahayn, ku wariyayna asaaniid ama silsilado kala duwan oo fara badan inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إن الله تعالى لم يخلق شيئا مما خلق قبل الماء."

" **Anna Allaaha Tacaalaa lam yakhluq shay'an mimmaa khalaqa qabla al maa'i".**
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Inuusan Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** shay'na abuurin wuxuu abuuray ka mid ah oo idil biyaha hortood."

Marka, Xadiithkaan iyo midka ka horreeyey, oo ay wariyeen Jaabir\جابر iyo midkuu wariyay Abuu Raazin\أبو رازن waxaa loo mideynayaa sidatan:
"Inuu qalinku ahaa waxa ugu horrecya. oo la abuuray, intaan ahayn Nuurka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo biyaha iyo Carshiga." Intaasuu warka Al Suddiyyu\السدي ku egyahay.

Waxaa kaloo la yiri: hormariddaas ay waxyaalahaas lasoo sheegay ay abuuridda ugu kala horreeyeen waxaa weeye mid jinsigiisa la xiriirta. oo ah sidatan: waxaa ugu horreeyey oo nuur ah oo uu Ilaahay abuuray waa nuurka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sida looga wariyay inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"أول ما خلق الله من الأنوار نوري."

" **Awwala maa khalaqa Allaahu mina al anwaari nuurii",**
oo macneheedu yahay:

"Waxa ugu horreeyey oo nuur nuurarka ka mid ah oo uu Ilaahay abuuray maa nuurkayga".

Sidaas oo kale weeye inta kalena: oo waxa wax lagu dhigo kooda ugu horreeyey waa Qalinka maqaadiirta dhigay; Carshiga ugu horreeyey oo uu Ilaahay abuurayna waaba Carshigiisa, ayadoo sariiraha ama kursiyada ay Boqorrada adduunkaan ku fariistaanna Carshi la yiraahdo.

Al Baydaawii\البيضاوي waana Imaamka tafsiirka leh wuxuu horraanshaha waxyaalka ka dhigay inay yihiin horraanshaha waxa jirmi leh oo keli ah, ee ma aha ayuu yiri horraanshaha wax. walba, oo Aayadda boqol iyo sagaal iyo labaatanaad ee Suuratu Tawbah\سورة التوبة oo oraneysa:

"وهو رب العرش العظيم."

"Wa Huwa Rabbu Al Carshi Al Cathiimi",
oo macneheedu yahay:

"Isaguna, waa Rabiiga leh Carshiga wayn", wuxuu yiri: "Carshigu waa waxa ugu horreeyey oo jirmi leh iyo kooda ugu weyn oo intooda kalena koobaya oo ku wareegsan".

Wuxuu Bukhaarii\البخاري Kitaabka Salaadda\كتاب الصلاة ku wariyay Xadiith la xiriira habeenka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la dheelmiyay, kaddibna Samada kor loogu qaaday, uuna Ilaahay hortegey. Waxaa Xadiithkaas ka mid ah inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"ثم عرج بي حتى ظهرت لمستوى أسمع فيه صرف القلم."

"Thumma curija bii xattaa thahartu li mustawaa asmacu fiihi sariifa (saad**) al aqlaami",**
oo macnihiisu yahay:

"Kaddibna sare ayaa la ii qaaday ilaa aan kor ahaaday meel korreysa oo aan markaan ku sugnaaday aan ka maqlayo sharqanta Qalimmada markay wax dhigayaan."

Meeshaas uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku sugnaadayna waa meel u korreysa ilaa heer uu ka arkay kawaa'inta jirta, uuna Ilaahay ka tusay amarkiisa iyo siduu khalqigiisa u dabbiro intuu doonayey inuu ka tuso. Taasna waa meel uusan axadna uga hor marin, oo aan hortiis, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, axadna la siin.

Sharqaantaas ay qalimmadu sameynayaanna waa dhawaaqa ka yeeraya markay qalimmadu xaashiyaha. wax ku dhigayaan.

Malaa'igtuna waxay dhigayaan waxaa weeye wuxuu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى go'aamiyey iyo Waxyigiisa. Waxay kaloo dhigayaan waxaa weeye waxay kasoo guurinayaan Al Llawxu Al Maxfuuthu\اللوح المحفوظ markuu Ilaahay ku amro iyo wixii uu doono inuu dabbiro oo maamulo. Taasoo ehelu sunnada xujjo u ah in Al Llawxu Al Maxfuuthu\اللوح المحفوظ qalimmo wax looga soo guuriyo lagana soo guuriyo Waxyiga iyo Maqaadiirta Ilaahay laguna. soo guuriyo Kutubta uu Ilaahay Rusushiisa kusoo dejiyo oo uu usoo waxyoodo.

Sidaas waxaa yiri Al Imaam Al Nawawii\الأمام النووي iyo Qaalli Ciyaad\القاضي عياض. Guurintaas ayaa wax cusub ah marka la dhigayo, laakiin Qadarka dhigan oo Looxa ku dhigan oo laga soo guurinayo waa qadiim fac weyn. ayadoo Looxa ku dhigiddiisa ay dhammaatay oo laga soo jeestay ka horba intaan Samaawaatka iyo arligaba la abuurin, qalinkii lagula dhigayna uu qallalay, oo ah khaddii ka qallashay, oo kuwii ku dhigay markay kasoo jeesteen ay qalimmadooda nadiifiyeen ayagoo raadkii khadda ka nadiifiyay oo ka suuliyay.

Marka waxaan ay Malaa'igtu dhigeyso waxay ku dhigeysaa waa ayaga kutubbadooda ama waraaqohooda, sida ayagoo kitaabka asalka ah kasoo guurinaya oo kutubbadooda kusoo guurinaya, oo kuwooda waxna ku reebaya waxna ka tirtiraya, siday Axaadithtu ugu soo aroortay.

Lawxul Maxfuuthkse\اللوح المحفوظ اللوح المحفوظ waxba lagama tirtiro.
Ibnu Al Qaayyim\إبن القيم wuxuu wariyay inay Qalimmadu laba iyo toban qalin yihiin, kuwaasoo kala martabo iyo darajo weyn, waxaana ugu sarreeya uguna qadar weyn:

Kow. Qalimu Al Qadari Al Saabiqi\قلم القدر السابق, oo ah qalinka horreeyey oo uu Ilaahay maqaadiirta khalqiga ku dhigay. Taqdiirtuse bilow ma ayan lahayn oo waligeed waxay ku jirtay rabidda iyo cilmiga Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى, siday culummdu u yiraahdeen, ayna ka mid yihiin

Al Nawawii\النووي, iyo Al Ubayyu\الأبي. Sidaas waxay ugu sugnaatay Xadiithka uu Abuu Daauud أبو داود\ ka wariyay Cubaadatu bin Al Ssaamit\عبادة بن الصامت, oo yiri:
"Waxaan maqlay Rasuulka llaahay,Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo oranaya:

"إن أول ما خلق الله القلم، قال له: "أكتب." قال: "يا رب، وما أكتب؟" قال: "أكتب مقادير كل شيئ حتى تقوم الساعة."

"Inna awwala maa khalaqa Allaahu Al Qalama, qaala lahu: "Uktub". Qaala: "Yaa Rabbi, wa maa Aktubu?" Qaala: "Uktub Maqaadiira kuula shay'in xattaa taquuma Al Saacatu", oo ah:

"Waxa ugu horreeyey oo uu Ilaahay abuuray waa Qalinka, markaasuu ku yiri:
"Dhig".
Qalinku wuxuu yiri:
"Rabbiyow maxaanna dhigaa?"
Wuxuu yiri:
"Dhig Maqaadiirta shay kulligiis ilaa as Saacaddu ka istaageyso, waa Maalinta Qiyaamee", wuxuuna ugu horreeyey waxa la abuuro Carshiga kaddib oo ka horreeyey. Axaadiithka thaahirkeeduna waa muuqaalkeeda kore oo loo jeedee waxay sheegayaan inuu qalin run ah yahay, kana sameysan nuur, sida Xadiithka Ibnu Cabbaas\إبن عباس: "Qalinkiisu waa nuur".

Iyo sida Xadiithka Mujaahid\مجاهد:
"Qalinku wuxuu ka sameysan yahay qasab".

Hadday sidaas tahayna waxaa weeye inuu ka sameysan yahay nuur leh muuqaalka qasabka, dhererkiisuna uu yahay shan boqol oo sano. Taas macneheedu waxaa weeye in labadiisa gees shan boqol oo sano loo kala safrayo, siduu abuu Al Shayk\أبو الشيخ Ibnu Cumar\إبن عمر uga wariyay. Balliciisuna intaas oo kale ayaa loo kala safraa. Iliggiisa ama carrabkiisa wax dhigana wuu kala dhanbalanyahay waxaana kasoo burqaneysa khadda.

Xadiith kale oo mursal ahna waxaa lagu wariyay inuu qalinku luul ka sameysan yahay, dhererkiisuna yahay toddoba boqol oo sano. Luulna waxaa loogu tilmaamay caddaantiisa, isagoo, nuur ka sameysan.

Shaykhu Al Islaami Al Siraaj Al Balqiinii\شيخ الأسلام السراج البلقيني, siduu uga wariyay wiilkiisu markuu taariikhdiisa ka warramay, wuxuu yiri:
"Qalinku waa Malag Malaa'igta ka mid ah, maxaa yeelay nuur ayuu ka sameysan yahay, Malaa'igtuna ayaguna nuur ayay ka sameysan yihiin. Caqli ayuuna leeyahay, una taagan yahay oo fuliyaa waxa la amro."

Marka qalinkaan ayaa ah qalinka koowaad, isagaana ugu qadar wayn. Waxayna culummada tafsiirka Quraanku yiraahdeen: waa qalinkaan midkuu Ilaahay ku dhaartay Suuratu Al Qalam سورة القلم\, uuna Cazza wa Jalla\عز وجل ku yiri:

ن وَالْقَلَمِ

"Nuun wa Al Qalami",

oo ah

"Waxaan ku dhaartay nuun iyo Qalinka".

Culummadu waxay yiraahdeen: waa qalinka Al Lawxu Al Maxfuuthu**اللوح المحفوظ** wax ku dhigay. Waxay kaloo yiraahdeenna waa qalin kasta oo wax lagu dhigo, ayadoo ku dhigiddaasi ay faaiidooyin badan dadka u leedahay.

Labo. Qalinka labaad waa "Qalamu Al Waxyi**قلم الوحي",** oo ah qalinka Waxyiga.

Saddex. Qalinka saddexaad waa "Qalamu Al Tawqiici cani Allaahi wa Rasuulihi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam**قلم التوقيع عن الله ورسوله، صلى الله عليه وسلم",** oo macneheedu yahay qalinka lagu dhigo waxa ka dhacaya. oo ka imaanaya Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Al Tawqiicu-na**التوقيع** waa "maa yuuqacu fii al kitaabi**ما يوقع قي الكتاب**" oo ah waxa kitaabka dhexdiisa lagu ahaysiinayo.

Afar. Qalinka afaraad waa "Qalamu dhibbu al abdaani allathii yuxfathu bihi sixxatuhaa **قلم طب البدن الذي يحفظ به صحته\",** oo macneheedu yahay: "Qalinla daawada jirarka oo caafimaadkooda lagu ilaaliyo".

Shan. Qalinka shanaad waa "Qalamu Al Taqiici cani al muluuki wa nuwaabihim, wa bihi tusaasu al mamaaliku**قلم التقيع عن الملوك ونوابهم، وبه تساس الممالك",** oo macneheedu yahay:
"Waa qalinka waxa ka dhacaya boqorrada iyo ku xigeennadooda, laguna, hoggaamiyo siyaasadda boqortooyooyinka, oo umuurta boqortooyooyinka ayaa lagu dabbiraa oo lagu maareeyaa".

Lix. Qalinka lixaad waa **"Qalamu Al Xisaabi wa Huwa allathii tadbudhu bihi al amwaalu, mustakhrijahaa wa masrafihaa wa maqaadiirihaa, wa huwa Qalamu Al Arzaaqi قلم الحساب وهو الذي تضبط به الأموال، مستخرجها ومصرفها ومقاديرها، وهو قلم الأرزاق\",**
oo macneheedu uu yahay:
"Qalinka xisaabta, waana midka lagu dhigo maalalka: meesha laga kasbo iyo meesha lagu bixiyo iyo maqaadiirtooda. Waana Qalina Arzaaqda**قلم الأرزاق .** "
Toddoba. Qalinka toddobaad waa "Qalamu Al Xukmi allathii tathbutu bihi al xuquuqu, wa tanfuthu bihi al qadaayaa**قلم الحكم الذي تثبت به الحقوق، وتنفذ به القضايا",** oo macneheedu yahay: "Qalinka Xukunka, laguna dhigo, xuquuqda, laguna fuliyo garsoorka. "

Sideed. Qalinka sideedaad waa **"Qalamu Al Shahaadati allathii tuxfathu bihi al xuquuqu قلم الشهادات الذي تحفظ به الحقوق\",** oo macneheedu yahay:
"Qalinka shahaadada oo ah marag xambaarka iyo marag furka oo xuquuqda lagu sugo."

Sagaal. Qalinka sagaalaad waa " Qalamu al tacbiiri, wa huwa kitaabu waxyi al manaami, wa tafsiirihi wa tacbiirihi**قلم التعبير، وهو كتاب وحي المنام، وتفسيره وتعبيره**", oo macneheedu yahay: "Qalinka tafsiirka riyada, wuxuuna dhigaa waxyiga qofka hurda loo waxyoonayo, iyo waxyigaas tafsiirkiisa iyo riyada cabbiriddeeda.

Toban. "Qalamu tawaariithi al caalami wa waqaa'icihi**قلم تواريث العالم ووقاعئه",** oo macneheedu yahay: Qalinka taariikhooyinka caalanka iyo waxyaalka dhexdfisa ka dhacah."

Kow iyo toban. Qalinka kow iyo tobnaad waa "Qalamu al lughati wa tafaasiilihaa **قلم اللغات وتفاصيلها\",** oo macneheedu yahay: "Qalinka luqada ama afka iyo tafaasiisheeda".

Laba iyo toban. Qalinka laba iyo tobnaad waa "Al Qalamu Al jaamici, wa huwa qalamu al raddi calaa al mubdhiliina, wa shubhu al muxarrifiina **القلم الجامع، وهو قلم الرد على المبطلين، وشبه المحرفين\",** oo macneheedu yahay
"Qalinka Kulmiya, waana qalinka u jawaabidda kuwa Diinta xumaynaya, celinayana mugdiyada ay kusoo gabbadaan kuwa Diinta beddelaya".

Qalimmadaas ayaa lagu dhigaa masaalixda caalanka iyo wuxuu ku suubanaanayo. Waxaa Jalaalo iyo waynaan qalinka ugu filan inaan Kutubbada Ilaahay lagu dhigin waxaan isaga ahayn, Ilaahayna Tacaalaa**الله تعالى** uu Kitaabkiisa Quraanka dhexdiisa kuba dhaartay. Intaas waxaan kasoo guurinnay ayadoo lasoo koobay kitaabka Aqsaamu Al Quraani**أقسام القرآن** uuna dhigay Ibnu Al Qayyim**إبن القيم\.**

Al Llawxu Al Maxfuuthu**اللوح المحفوظ**

(Labo) Qaybta labaad ee nuurkaasna (waxaan dib ugu noqonnay tarjumidda iyo macneynta Xadiithka Jaabir bin Cabdu Allaahi Al Ansaarii**جابر بن عبد الله الأنصاري\)** wuxuu ka abuuray Lawxul Maxfuudka**اللوح المحفوظ** .

Al Carshu**العرش**

(**Saddex**) Qaybta saddexaad ee nuurkaasna wuxuu ka abuuray Carshiga**العرش** .

(**Afar**) Markaasuu Ilaahay, Tabaaraka wa Tacaalaa**الله تبارك وتعالى**, qaybta afaraad ee nuurkaas wuxuu u qaybiyay afar qaybood oo kale, oo kala ah:

Xamalatu Al Carshi**حملة العرش**

Markaasuu wuxuu qaybta koowaad ka abuuray Malaa'igta ah Xamalatu Al Carshi**حملة العرش** , oo ah kuwa Carshiga xambaarsan, ahna sideed Malag oo suuradda ama ekaanshaha Al Awcaalu **الأعوال** leh oo ah orgiyada buuraha dushooda ku nool ah, siday eraygaas u fasireen Al Nihaayah **النهاية** ee Ibnu Al Athiir**إبن الأثير** iyo Lisaanu Al Carab**لسان العرب\,** siday u wariyeen Abuu Yaclaa **أبو يعلى** iyo Ibnu Marduwayh**إبن مردويه** iyo Ibnu Khuzaymah**إبن خزيمة** iyo Al Xaakim**الحاكم** oo saxiix ka dhigay, iyo ghayrkoodba, ayna ka wariyeen Al Cabbaas**العباس** oo uu Xadiithku isaga ku egyahay, Allaha raalli ka noqdee.

Ibnu Jariirna**إبن جرير** wuxuu ibnu Zayd**إبن زيد** oo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la xiriiriyay isagoo uu Xadiithku mursal yahay, inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"يحمل اليوم أربعة ويوم القيامة ثمانية."

"Yaxmiluhu al yawma arbacatun wa Yawma Al Qiyaamati thamaaniyatun ",
oo macnihiisu yahay:

"Waxaa (Carshiga) xambaarsan maanta afar (Malag), Maalinta Qiyaamana sideed (Malag)."

Ibnu Jariir\ابن جرير iyo ghayrkiisba waxay kaloo Ibnu Cabbaas\ابن عباس ka wariyeen in Aayadda toddoba iyo tobnaad ee Suuratu Al Xaaqqah\سورة الحاقة macneheedu yahay: "Waa sideed saf oo Malaa'ig ah, oo tiradooda uusan aqoon Ilaahay mooyee."

Aayadduna waxaa weeyey:

وَيَحْمِلُ عَرْشَ رَبِّكَ فَوْقَهُمْ يَوْمَئِذٍ ثَمَانِيَةٌ (17)

"Wa Yaxmilu Carsha Rabbika fawqahum yawma'ithin thamaaniyatun",
oo macneheedu yabay:

"Carshiga Rabbigaana waxaa korkooda ku xambaaraya Maalintaas sideed Malag."

Malaa'igta Samada toddobaad dhexdeeda ah waa Malaa'igta Al Muqarrabuuna\الملائكة المقربون, kuwa la soo dhoweeyey, kuwa acmaasha ku dhiga uurka kutubbada, khayraatkana ilaaliya.

Samada toddobaad korkeeda waxaa ah Malaa'igta la yiraahdo Xamalatu Al Carshi Al Karuubiyuuna\حملة العرش الكروبيون, kuwa Carshiga Rabbi xambaarsan.

Mid walba oo Xamalatu Al Carshi ka mid ah wuxuu leeyahay wajiyo kala duwan, iyo indho kala duwan oo uu intasba jirkiisa ku leeyahay.

Cabdu Al Razzaaq\عبد الرزاق iyo ibnu Al Munthir\ابن المنذر iyo ghayrkooduba waxay Wahab\وهب ka wariyeen inuu yiri:
"Xamalu Al Carshi\حملة العرش waa afar, oo Malag kasta oo ayaga ka mid ihi wuxuu leeyahay afar waji iyo afar baal: labo baal xagga wajigiisa ayay yihiin inuusan Carshiga fiirin oo uu markaas suuxo ama dhintaba, iyo laba baal oo uu ku duulo. Afartaas Malag lugohoodu waxay ku suran yihiin arligaan. Mid walboo ayaga ka mid ahna wuxuu leeyahay waji dibi iyo waji libaax iyo waji dad iyo waji gorgor.
Afartaas Malag ma ayan laha hadal aan ahayn:
"Subbuuxun Qudduusun, Allaahu Al Qawiyyu, mala'at Cathamatuhu Al Samaawaati wa al arda
"سبوح قدوس، الله القوي، ملأت عظمته السماوات و الأرض
oo macnheedu yahay:
"Subbuuxun Qudduusun Ilaahay waa Midka Xooga badan oo ay Weynaantiisu buuxisay Samaawaatka iyo arliga."

Abuu Shaykh\أبو الشيخ wuxuu ku ziyaadiyey oo uu Wahab\وهب ka wariyay:
"Malag ayaga ka mid ihi wuxuu leeyahay suuradda dad, wuxuuna ugu shafeeca qaada Banii Aadamka arzaaqdooda. Malagna wuxuu leeyahay suuradda gorgor, wuxuuna ugu shafeeco qaadaa shimbiraha arzaaqdooda. Malagna wuxuu lecyahay suuradda Nuurka, wuxuuna ugu shafeeco qaada bahaa'imka arzaaqdooda. Malagna wuxuu leeyahay suuradda libaax,wuxuuna ugu shafeeco qaada dugaagga arzaaqdooda. Afartaas Malag markay Carshiga xambaaraan jilbohooda ayay hoos ugu dhacaan Cathiimnimada Ilaahay daraadeed. Markaasaa waxaa loo laqaniyaa oo ay yiraahdaan: Laa xawla wa laa quwwata illaa bi Allaahi**لا حول و لا قوة إلا بالله**,

oo ah ma ay jirto xeelo iyo itaal inuu, ka yimaado, Ilaahay mooyee. Markay sidaas yiraahdaan ayay kor u istaagaan oo ay cagohooda ku istaagan.

Cuthmaan bin Saciid Al Daarimii\عثمان بن سعيد الدارمي wuxuu ibnu Cabbaas\إبن عباس ka wariyay inuu yiri:
"Xamalatu Al Carshiحملة العرش waxay leeyihiin geeso leh canqawyo (waa meelo buuran, oo soo kuusan) oo la mid ah canqawayada lo'duurka. Mid walba oo ayaga ka mid ah inta u dhexeysa reys ma gaadhadiisa ilaa canqawgiisa waxaa loo socdaa ilaa shan boqol oo sano.
Inta u dhexeysa foodda sankiisa ilaa kalxantiisana waa safar shan boqol oo sano ah. Inta u dhexeysa kalxantiisa ilaa dacasha dhegtiisana shan boqol oo sano."

Malaa'igtaas cod dheer ayay ku tahliilsanayaan (ayagoo leh)\لا إله إلا الله , ayagoo Carshiga xaggiisa fiirinaya, aanna joojineyn tahliisha. Hadduu Malag ayaga ka mid ihi ballkiisa arligaan usoo diro, hal riish oo baalkiisa ka mid ah ayaa aduunkaan oo idil dabooli lahaa. Tiradoodana Ilaahay keli ayaa og.
Ihnu Al Munthir\إبن المنذر iyo abuu Al Shaykh\أبو الشيخ iyo al Bayhaqii\البيهقي oo kitaabkiisa Al Shicbi\شعب الأيمان ku wariyay, waxayna kulligood ka wariyeen Haaruun bin Riyaab\هارون بن رياب inuu yiri:
"Xamalatu Al Carshiحملة العرش waa sideed, madaxdooduna waxay yihiin Carshiga agtiisa xagga Samada Toddobaad, cagohooduna waxay yihiin toddobada arli kan ugu hooseeya, waxayna leeyihiin geeso la mid ah geesaha orgiyada buuraha dushooda ku nool. Inta u dhexeysa salka geeska midkood ilaa foodda uu geesku ku dhammaado waxaa loo safraa shan boqol oo sano. Sideedaas Malag waxay cod qurxoon oo sahal ah isugu jawaabaan oo ay yiraahdaan, ayadoo ay afar ka mid ihi tiraahdo: "Subxaanaka Allaahumma wa bi Xamdika calaa Xilmika bacda Cilmika\سبحانك أللهم و بحمدك على حلمك بعد علمك", oo macneheedu yahay: "Subxaanaka, Ilaahayow iyo xamdigaaga, kuna salaysan turiddaada kaddib cilmigaaga".

Markaasay afarta kale tiraahdaa: "Subxaanaka wa bi Xamdika calaa Cafwika bacda Qudratika \سبحانك و بحمدك على عفوك بعد قدرتك", oo macneheedu yahay: "Subxaanaka Ilaahayow iyo Xamdigaaga, sidaad u cafidid adigoo awood leh kaddib".

Waxaa hadalkaas ka muuqata inay Malaa'igtaasi adduunkaan joogaan, waxaase wuxuu ibnu Zayd\إبن زيد ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"يحمل اليوم أربعة، ويوم القيامة ثمانية."

"Yaxmiluhu al yawma arbacatun, wa yawma al qiyaamati thamaaniyatun",
oo macnihiisu yahay:

"Maanta waxaa xambaarsan afar, Maalinta Qiyaamena sideed."

Abu Al Shaykhna\أبو الشيخ wuxuu Wahab\وهب ka wariyay inuu yiri:
"Xamalatu Al Carshiحملة العرش maanta waa afar, markay tahay Maalinta Qiyaamane waxaa lagu xoojiyaa afar kale."

Ibnu Jariir**إبن جرير**, iyo ibnu Al Munthir**المنذر** iyo ibnu abii Xaatim**إبن أبي حاتم** waxay ibnu Cabbaas**إبن عباس** ka wariyeen inuu hadalka Ilaahay ee ku xusan Aayadda toddoba iyo toban ee Suuratu Al Xaaqah**سورة الحاقة**, oo ah:

وَيَحْمِلُ عَرْشَ رَبِّكَ فَوْقَهُمْ يَوْمَئِذٍ ثَمَانِيَةٌ (17)

"Wa Yaxmilu Carsha Rabbika fawqahum yawma'ithin thamaaniyatun ",
oo macneheedu yahay:

"Carshiga Rabbigaana waxaa korkooda ku xambaaraya Maalintaas sideed Malag." inuu macneheedu yabay sideed saf oo Malaa'ig ah, tiradoodana uusan axad aan Ilaahay aqoon."

Al Kursiyyu\الكرسي

(2) Qaybta labaadna wuxuu Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** ka abuuray Al Kursiyyu**لكرسي** , taasoo xujjo u ah inuu Kursigu ka duwanyahay Carshiga.

Malaa'igta\الملائكة

(3) Qaybta saddexaad ee nuurkaasna wuxuu ka abuuray Malaa'igta**الملائكة** inteeda kale, ayadoo ay Malaa'igtu yihiin kuwa makhluuqaadka ugu fara badan.

Xadiithkaan Cabdu Al Razzaaq**عبد الرزاق** wuxuu fasirayaa Xadiithka kale oo uu Muslim**مسلم** wariyay oo uu Ilaahay, Tabaaraka wa Tacaalaa**الله تبارك و تعالى**, ku leeyahay:

"خلقت الملائكة من نور."

"Khalaqtu Al Malaa'ikata min nuurin",
oo ah:

"Waxaan ka abuuray Malaa'igta nuur."

Abu Al Shaykhna**أبو الشيخ** wuxuu Cikrimah**عكرمة** ka wariyay inuu Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** yiri:

"خلقت الملائكة من نور العزة."

"Khalaqtu Al Malaa'ikata min nnuuri Al Cizzati",
oo ah

"Malaa’igta waxaan ka abuuray nuurka Cizzada**العزة** ".

Abuu Al Shaykh**أبو الشيخ** wuxuu kaloo Yaziid bin Ruumaan**يزيد بن رومان** ka wariyay inay soo gaartay in Malaa'igta laga abuuray Ruuxa Ilaahay.

Erayga Malak wuxuu ka yimid Al Mal'aku**الملأك** oo ah risaalada ama warqadda ama dhambaalka, oo waxay Carabtu tiraahdaa aliknii ilaa fulaani**ألكني إلى فلان** oo macneheedu yahay iga gaarsii hebel. Asalka erayguna waa aliknii**ألكني**.
Malagguna Ilaahay ayuu ciduu u diro wax ka gaarsiiyaa. Sidaas waxaa ku fasiray Al Qaamuusu Al Muxiidhu**القاموس المحيط**.

Intuu Ilaahay abuuray waxaa ugu tiro badan Malaa'igta. Malaa'igtu waxay ku sugan yihiin Samaawaatka iyo arliyada iyo badaha. Malaa'igtu labo ayay u qaybsan yihiin:

(1) Qayb ay hawshooduba tahay in cibaadeystaan, oo taasba loo abuuray.

(2) Qayb marna cibaadeysaneysa, hawlo kale oo loo dirana ay u dheer tahay, oo markayan mid hayn midda kale ku mashquulsan.

Qaybta koowaad waxaa kaloo ka mid ah toddobaatan kun oo Malag oo maaalin walba Al Baytu Al Macmuuri**البيت المعمور**, oo Samada toddobaad ku yaalla oo Kacbada korkeeda ku beegan, ku tukata oo aan mar dambe kusoo laabanayn. Waana maalin walba.

Wuxuu Al Bayhaqii**البيهقي** iyo Abuu Al Shaykhi**أبو الشيخ** iyo ghayrkoodba wariyeen inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إن لله ملائكة ترعد فرائصهم من مخافته، ما منهم من ملك يقطر من عينه دمعة إلا وقعت ملكا قائما يسبح، و ملائكة سجود منذ خلق الله السماوات و الأرض، لم يرفعوا رأوسهم، و لا يرفعونها إلى يوم القيامة، و ملائكة ركوع لم يرفعوا رأوسهم، و لا يرفعونها إلى يوم القيامة، و صفوفا لم ينصرفوا عن مصافهم، و لا ينصرفون عنها إلى يوم القيامة. فإذا كان يوم القيامة تجلا لهم ربهم عز و جل، فنظروا إليه، و قالوا: "سبحانك، ما عبدناك كما ينبغي لك."

"Inna li Allaahi Malaa'ikatan tarcadu faraa'isuhum min makhaafatihi, maa minhum min malakin yaqdharu min caynihi damcatun illaa waqacat malakan qaa'iman yusabbixu, wa Malaa'ikatun sujuudun munthu khalaqa Allaahu Al Samaawaati wa al arda, lam yarfacuu ru'uusahum, wa laa yarfacuunahaa ilaa Yawmi Al Qiyaamati, wa Malaa'ikatun rukuucun lam yarfacuu ru'uusahum wa la yarfacuunahaa ilaa Yawmi Al Qiyaamati, wa sufuufan lam yansarifuu can masaafihim, wa laa yansarifuuna canhaa ilaa Yawmi Al Qiyaamati. Fa ithaa kaana Yawmu Al Qiyaamati tajallaa lahum Rabbuhum Cazza wa Jalla, fa natharuu Ilayhi, wa qaaluu: "Subxaanaka, maa cabadnaaka kamaa yanbaghii laka."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay wuxuu. leeyahay Malaa'ig ay daqayadoodu cabsidiisa ay la dubaaxiyaan, uusanna jirin mid ayaga ka mid ah ee hadday dhibic boohina kasoo dhacdo ishiisa ay dhacayso ayadoo ah Malag taagan oo tasbiixsanaya; iyo Malaa'ig sujuudsan tan iyo markuu Ilaahay abuuray Samaawaatka iyo arliga, aanna madaxdooda sare usoo qaadin, aanna soo qaadeyn ilaa Yawmul Qiyaamaha; iyo Malaa'ig rukuucsan oo aan madaxdooda kor usoo qaadin aanna soo qaadayn ilaa Yawmul Qiyaamaha, iyo Malaa'ig safan oo aan safafkooda ka bixin, aanna ka baxayn ilaa Maalinta Qiyaame. Markaasey Markay ahaato Maalinta Qiyaame ayuu Rabbigood Cazza wa Jalla isu muujinayaa oo ay arkayaan oo fiirinayaan, waxayna yiraahdaan: "Subxaanaka, kuuma aanan caabudin sidii kuu habbooneyd oo aad lahayd."

Waxaa jirta Malaa'ig Dhirta u xilsaaran, siduu Abuu Al Shaykhi**أبو الشيخ** u wariyay, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"ليس من خلق الله أكثر من الملائكة. ما من شيئ ينبت إلا و ملك موكل بها."

"Laysa min khalqi Allaahi akthara mina Al Malaa'ikati. Maa min shay'in yanbutu illaa wa Malakun muwaakulun bihaa",
oo macnihiisu yahay:
"Ma jiro khalqiga Ilaahay wax ka. tiro badan Malaa'igta. Ma jiro shay dhulka kasoo dhasha ee waa kan illaa leh Malag loo wakiishay."

Malaa'igta arzzaqda u xilsaaran

Waxaa jirta Malaa'ig Arzaaqda u xilsaaran, siduu Al Xaakim**الحاكم** u wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إن لله ملائكة موكلين بأرزاق آدم، قال لهم: "أيما عبد وجدتموه جعل الهم هما واحدا فضمنوا رزقه السماوات و الأرض و بني آدم. وأيما عبد وجدتموه طلب: فإن تحرى الصدق فطيبوا له ويسروا، و إن تعدى ذلك فخلوا بينه و بين ما يريد، ثم لا ينال فوق الدرجة التي كتبتها له."

"Inna li Allaahi Malaa'ikatan muwakkaliina bi arzaaqi Aadama, qaala lahum: ayyamaa cabdun wajadtumuuhu jacala al hamma hamman waaxidan fa daminuu rizqahu Al Samaawaati wa Al Arda wa banii Aadama. Wa ayyamaa cabdun wajadtumuuhu dhalaba: fa in taxarraa al sidqa fa dhiibuu lahu wa yassaruu, wa in tacaddaa thaalika fa khalluu baynahu wa bayna maa yuriidu, thumma laa yanaalu fawqa al darajati allatii katabtuhaa lahu."
Xadiithka oo uu isaguna Al Tarmathii**الترمذي**- Al Nawaadir**النوادر** ku wariyay macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay wuxuu leeyahay Malaa'ig u xilsaaran arzaaqda Aadan, wuxuuna ku yiri: addoonkaad heshaan isagoo hammigiisa oo ah wuxuu doonayo mid keli ah ka dhigay, waxaad rizqigiisa u kafaalo saartaan Samaawaatka iyo arliga iyo banii Aadan. Addoonkaadse heshaan isagoo rizqigiisa doonanaya, hadduu si suuban ku doonto u wanaajiya una sahla, hadduuse xad gudbo isaga iyo wuxuu doonayo isaga dhex baxa, isagoon heleyn darajo ka korreysa middaan u qoray."

Malaa'igta qofka ilaalisa

Waxaa jirta Malaa'igta Ilaalada ah, siduu Ilaahay Aayadaha toba iyo kow iyo tobnaad ee Suuratu Al Infidhaar**سورة الإنفطار** ku yiri:

وَإِنَّ عَلَيْكُمْ لَحَافِظِينَ (10) كِرَامًا كَاتِبِينَ (11)

"Wa inna calaykum la xaafithiina(10)**Kiraaman kaatibiina**(11)**"**
oo macnohoodu yahay:

"Malaa'ig ayaan idin ilaalineysa(10) Oo sharaf lef waxna dhigaya(11)".

Waxaana la yiri qof kasta waxaa ka ilaalisa, labo Malag xagga midigta iyo xagga bidixda. Waxaa kaloo la yiri waa afar Malag, oo labana ay habeenkii yihiin, labana maalintii. Waxaa kaloo la yiri inuu Malag shanaad zaa'id ku yahay, kanoo aan habeen iyo maalin midna ka tegin.

Waxaa Cuthmaan\عثمان, Allaha raalli ka noqdee, laga wariyay inuu yiri: Waxaan iri:

"Rasuulka llaahayow meeqa Malag ayaa addonka la jirta? Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"ملك عن يمينك على حسناتك، و هو أمين على الذي على الشمال. فإذا عملت حسنة كتب عشرا، وإذا عملت سيئة قال الذي على الشمال للذي على اليمين: "أكتب؟" قال: "لا، لعله يستغفر." فإذا قال ثلاثا قال: "نعم، أرحنا الله منه، فبئس القرين، ما أقل مراقبته لله تعالى، و أقل استحياءه من الله"، يقول الله: " مَا يَلْفِظُ مِنْ قَوْلٍ إِلَّا لَدَيْهِ رَقِيبٌ عَتِيدٌ" وملكان من بين يديك و من خلفك، يقول الله: " لَهُ مُعَقِّبَاتٌ مِنْ بَيْنِ يَدَيْهِ وَمِنْ خَلْفِهِ يَحْفَظُونَهُ مِنْ أَمْرِ اللَّهِ"، و ملك قابض على ناسيتك: فإذا تواضعت لله رفعك، وإذا تجبرت على الله قصمك. وملكان على شفتيك يحفظان عليك إلا الصلاة على النبي، وملك قائم على عينيك، فهؤلاء عشرون ملكا على كل آدمي."

"Malakun can yamiinika calaa xasanaatika, wa huwa amiinun calaa allathi cala al shimaali. Fa ithaa camalta xasanatan kataba cashran, wa ithaa camalta sayyi'atan qaala allathii calaa al shimaali li allatbil calaa al yamiini: Aktubu? Qaala laa, lacallahu yastaghfiru. Fa ithaa qaala thalaathan qaala: nacam, araxanaa Allaahu minhu, fa bi'sa al qariinu, maa aqalla muraaqabatahu li Allaahi Tacaalaa, wa aqalla istixyaa'ahau mina Allaahi, yaquulu Allaahu "Maa yalfithu min qawlin illaa ladayhi Raqiibun Catiidun". Wa Malakaani min bayni yadayka wa min khalfika, yaquulu Allaahu "Lahu mucaqqibaatun min bayni yadayhi wa min khalfihi yaxfathuunaha min amri Allaahi", wa Malakun qaabidun calaa naasiyatika: fa ithaa tawaadacta li Allaahi rafacaka, wa ithaa tajabbarta calaa Allaahi qasamaka. Wa Malakaani calaa shafatayka yaxfathaani calayka illaa Al Ssalaata calaa Al Nabiyyi, wa Malakun qaa'imun calaa caynayka. Fa haa'ulaa'i casharatun yubdaluuna, li anna Malaa'ikata al layli siwaa al nahaari. Fa haa'ulaai cishruuna Malakan calaa kulli aadamiyyin".

Xadiithka oo uu Ibnu Jariir Al Dhabarii\ابن حرير الطبري wariyay macnihiisu waxaa weeye:

"Malag midigtaada ah oo xasanaatkaaga aad fashid u xilsaaran, madaxna u ah midka bidixdaada ah. Marka markaad camal suuban sameysid wuxuu dhigaa. toban xasano. Haddaad camal xun oo dambi ah samaysidna, midka bidixdaada ahi wuxuu midka midigta ah ku yiraahdaa:
"Ma dhigaa?"
Wuxuu leyahay:
"Maya, waaba intaasoo oo uu istighfaarsado oo uu dambi dhaafid weydiistee."

Markuu sidaas saddex goor ugu jawaabo, ayuu wuxuu ku yiraahdaa:
"Haa, dhig, Allaha nooga raaxeeyeee, waana mid lagu lammaansanaado oo xune, inuu Ilaahay fiirinayana oo uu u jeedo markuu waxaas xun sameynayana aan dan badan ka lahayne, llaahayna aan ka. Xishooneyne".

Ilaahay wuxuu leeyahay (waana Aayadda sideed iyo tobnaad ee Suuratu Qaaf**سورة قف**):
”Wax kastoo lagu hadlo waxaa la jooga Raqiib**رقيب** iyo Catiid**عتيد** oo dhigaya".

Iyo laba Malag oo hortaada iyo gadaashaada ah, oo Ilaahay wuxuu leeyahay (waana Aayadda kow iyo tobnaad ee Suuratu Al Racdi**سورة الرعد**):
"Wuxuuna leeyahay (ruux kasta) kuwo isku beddela (oo Malaa’ig ah) oo hortiisa iyo gadaashiisa ah, kuna dhawra amarka Ilaahay". Iyo Malag foodaada haya: haddaad marka Ilaahay isu jejebisid kor ayuu kuu qaadayaa, haddaadse Ilaahay iska kibrisid wuu ku jebinayaa. Iyo labo Malag oo bashimahaaga ah ilaalinayana ku sallintaada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Iyo Malag taagan afkaaga oo ka ilaalinaya inay abeeso afkaaga gasho.

Iyo labo Malag oo labadaada indhood ah. Intaasi waa toban la beddelayo, ayadoo ayan Malaa'igta habeenku ahayn Malaa'igta maalinta. Marka kuwaasi waa labaatan Malag oo qof kasta oo aadami ah korkiisa ah."

Abuu Daauudd**أبو داود** wuxuu kitaabka Al Qadar**كتاب القدر**, Al Dhabraanina**الطبراني** iyo ghayrkoodba ay wariyeen inuu Nabigu, Sallaa Alllaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"وكل بالمؤمنين ستون و ثلاث مئأة ملك يدفعون ما لم يقدر عليه."

"Wukkila bi al Mu’miniina sittuuna wa thalaathu mi'atin Malakin yadfacuuna maa lam yaqdir calayhi",
oo macnihiisu yahay:

"Waxaa loo wakiishay mu'min kasta saddex boqol iyo lixdan Malag oo ilaalinaya, kana celinaya waxaan loo qadarin."

Malagga cunugga caloosha hooyadiis ekaanshihiisa ku sameeya

Waxaa isaguna jira Malagga Masawiridda cunugga Aadan**آدم** u wakiilan.
Wuxuu Muslim**مسلم** wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إذا مر بالنطفة ثنتان وأربعون ليلة، بعث الله إليها ملكا، فصورها وخلق سمعها وبصرها وجلدها وشحمها وعظامها."

"Itha marra bi al nudhfati thnataani wa arbacuuna laylatin, bacatha Allaaahu ilayhaa Malakan, fa sawwarahaa wa kahalaqa samcahaa wa basarahaa wa jildahaa wa shaxmahaa wa cithaamahaa",
oo macnihiise yahay:

"Markay dbibicda minka ku xasishay labo iyo afartaan habeen ka gudbaan, Ilaahay wuxuu usoo diraa Malag, markaasuu (qofkaas) masawiraa, oo uu maqalkeeda abuuraa iyo araggeeda iyo haraggeeda iyo xayrteeda iyo lafabeedaba".

Al Dhabraanina**الطبراني** riwaayadiisu waxay warisay:

"إن النطفة إذا استقرت في الرحم، فمضى لها أربعون يوما، جاء ملك الرحم، فصور عظمه ولحمه ودمه وشعره وبشره."

"Inna al nudhfata- ithaa istaqarrat fii al rraximi, fa madaa lahaa arbacuuna yawman, jaa'a Malaku al rraximi, fa sawwara cathamahu wa laxmahu wa damahu wa shacrahu wa basharahu",
oo macnihiisu yahay:

"Markay dhibicdu minka ku sugnaato, oo ay afartan maalmood kasoo wareegaan, waxaa yimaada Malagga minka u wakiilan, markaasuu wuxuu masawiraa lafihiisa iyo hilibkiisa iyo dhiiggiisa iyo timihiisa iyo haraggiisa."

Malagga badbaadinta cunugga caloosha ku jira u xilsaaran

Malaggaanna waa mid kale oo aan ahayn Malagga Cunuggaas uurka ku jira u xil saaran oo Abuu Al Shaykh\أبو الشيخ wuxuu sanad adag Ibnu Cabbaas\إبن عباس uga wariyay inuu yiri:

"وكل بالجنين ملك، إذا نامت الأم واضطجعت رفع رأسه، لو لا ذلك لغرق في الدم."

"Cunuggaas minka ku jira waxaa u wakiilan Malag, oo markay hooyadiis seexato oo ay dhinaca dhulka dhigto, cunuggaas madaxiisa ayuu kor u qaada, haddii kale dhiigga ayuu ku hafan lahaa."

Malaa'igta daruuraha u duwa meesha la amro

Waxaa jira ayaguna Malaa'ig daruuraha dhexdooda kusoo dega, oo u duwa markaas meesha la amro, siduu u wariyay Xadiith marfuuc ah ee uu wariyay Abuu Al Shaykh**أبو الشيخ.**

Malaa'igta dhigta dadka jimcaha masjidka yimaada

Waxaa ayaguna jira Malaa'igta Jicmaha Dhigta dadka Masjidka yimaada, siday u wariyeen Bukhaarii**البخاري** iyo Muslim**مسلم** iyo Axmad**أحمد**, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إذا كان يوم الجمعة كان على كل باب من أبواب المسجد ملائكة يكتبون الناس على قدر منزلهم الأول فالأول. فإذا جلس الأمام طووا الصحف، وجاءوا يستمعون الذكر."

"Ithaa kaana yawmu Al Jumucati kaana calaa kulli baabin min abwaabi al masjidi Malaa'ikatun yaktubuuna al nnaasa calaa qadari manaazilihim al awwalu fa al awwalu. Fa itha jalasa al Imaamu dhawuu al ssuxufa, wa jaa'uu yastamicuuna al thikra",
oo macnihiisu yahay:

"Markay maalinta jimcaha ah tahay, waxaa albaab walba ee masjidka ah Malaa'ig dhigaysa dadka oo mid walba meeshiisa dhigeysa, siday u kala soo horreeyeen. Markuu Imaamku fariisto waraaqohooda way duubaan, waxayna yimaadaan si ay thikriga (Khudbada Jimcaha) u dhegeystaan".

Wuxuuna Imaam Axmad**الأمام أحمد** wuxuu Abii Saciid**أبي سعيد** ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إذا كان يوم الجمعة قعدت الملائكة على أبواب المسجد، يكتبون من جاء من الناس على قدر منازلهم، فرجل قدم جزورا أو رجل قدم بقرة، ورجل قدم شاة، ورجل قدم دجاجة، ورجل قدم عصفورا، ورجل قدم بيضة. فإذا أذن المؤذن وجلس الأمام على المنبر طووا الصحف، ودخلوا المسجد يستمعون الذكر."

"Ithaa kaana yawmu al Jumucati qacadat al Malaa'ikatu calaa abwaabi al masjidi, yaktubuuna man jaa'a mina al nnaasi calaa qadari manaazilihim, fa rajulun qadama juzuuran aw rajulun qadama baqaratan, wa rajulun qadama shaatan, wa rajulqn qadama dijaajatan, wa rajulun qadama cusfuuran, wa rajulun qadama baydatan. Fa ithaa athana al muath-thinu wa jalasa al Imaamu calaa al minbari dhuwuu al ssuxufa, wa dakhaluu al masjida yastamicuuna al thikra",
oo manihiisu yahay:

"Markay maalinta jimcaha ah tahay, ayay Malaa'igtu waxay fariisataa albaabbada masjidka ayagoo ku qoraya dadka imaanaya qof walba meeshiisa (waa siday u soo kala horeeyeeen ayay u kala ajar badan yihiin): waxaana nini keenay rati ama sac (waa wax badan ayuu khudbada kasoo hormaray), ninna wuxuu keenay ceesaan, ninna wuxuu keenay dijaajad, ninna wuxuu keenay shimbir, ninna wuxuu keenay (kulligood waa sadaqo ahaan ayaa laga wadaa) ukun. Markaasay markuu mu'athinku aathaamo, Imaamkuna uu minbarka ku fariisto, ayay waraaqohooda (ay wax ku dhigayeen) duubaan, ayna masjika galaan, ayna thikrga (waa khubdaddee) dhegeystaan."

Malaa’igta jannada iyo naarta maamusha\خزنة الجنة وخزنة النار

Waxaa ayaguna jira Malaa'igta Jannada Maamusha, oo ah Ridwaan**رضوان** iyo inta isaga raacsan, iyo Malaa'igta Naarta Maamusha, oo ah Maalik**مالك** iyo isaga inta raacsan, ayadoo uuba Ilaahay Suuratu Al Mudath-thir**سورة المدثر** Aayaddeeda soddonaad ku yiri:

عَلَيْهَا تِسْعَةَ عَشَرَ (30)

"Calayhaa tiscata cashara(30)**",**
oo macneheedu yahay:

"Waxaana korjooga sagaal. iyo toban".
Tirada maamulayaasheedana Ilaahay keli ah ayaa ogsoon.

Malaa’igta qofka isu daba marta\المعقبات

Waxaa kaloo jira ayaguna Ma1aa'igta Mucaqqibbatka**المعقبات** ah oo isu daba marta, siday Imaam Maalik**الأمام مالك** iyo Bukhaarii**البخاري** iyo Muslim**مسلم** uga wariyeen Abuu Hurayrah**أبو هريرة** inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"يتعاقبون فيكم ملائكة بالليل وملائكة بالنهار، ويجتمعون في صلاة الفجر وصلاة العصر. ثم يعرج الذين يأتوا فيكم، فيسألهم وهو أعلم: "كيف تركتم عبادي؟" فيقولون: "تركناهم وهم يصلون، وآتيناهم وهم يصلون."

"Yatacaaqabuuna fiikum Malaa'ikatun bi al llayli wa Malaa'ikatun bi al nnahaari, wa yajtamicuuna fii salaati al Fajri wa salaati al Casri. Thumma yacruju allathiina y'atuu fiikum, fa yas'aluhum wa Huwa Aclamu: "Kayfa taraktum cibaadii?" fa yaquuluuna: "Taraknaahum wa hum yusallnuna, wa aateynaahum wa hum yusalluuna",

oo macneheedu yahay:

"Waxaa isu kiin dhaafaya Malaa'igta habeenka iyo Malaa'igta maalinta, waxayna ku kulmaan salaadda subax iyo salaadda casar. Markaasey kuwii hore idiinku yimid Samada kor u tafayaan. Markaasuu (Ilaahay) waydiinayaa, Isagaana uga cilmi leh: "Sidee baad addoommadeyda uga soo tagtaan?" Markaasey waxay leeyihiin: ”Waxaan kasoo tagnay ayagoo salaad tukanaya, waxaanna u tagnay ayagoo salaad tukanaya".

Ibnu Xibbaan**إبن حبان** wuxuu yiri:
"Waxaa Xadiithkaan ku sugan daliil cad inay Malaa’igta habeenku soo degato ayadoo uu dadku salaadda casar ku jiro, oo ay markaas ay Malaa'igta maalintu ay daba marto oo ay Samada tafto."

Malaa’igta ”Aamiin\آمين” tiraahdaa

Waxaa ayaguna, jira Ma1aa’igta Aamiin**آمين** tiraahda markuu kan tukanayo Quranka akhriyo, siday uga wariyeen Maalik**مالك** iyo Bukhaarii**البخاري** iyo ghayrkoodba Abuu Hurayrah**أبو هريرة**, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إذا قال الإمام "ولاالضالين" فقولوا آمين، فإنه من وافق قوله قول الملائكة غفر له ما تقدم من ذنبه."

"ithaa qaala al Imaamu "Wa laa al daalliina" fa quuluu Aamiin, fa innahu man waafaqa qaw1uhu qawla Al Malaa'ikata ghufira lahu maa taqaddama min thanbihi",
oo macneheedu yahay:

"Markuu Imaamu yiraahdo Wa laa al daalliina**ولا الضالين** (oo ah Aayadda todoobaad ee Faataxada**الفاتحة,** macneheeduna yahay aanna ahayn kuwa lunsan) waxaad tiraahdaan Aamiin **آمين,** maxaa yeelay midka hadalkiisaasi waafaqo hadalka Malaa’igta (oo ayaguna Aamin**آمين** leh) waxaa loo dhaafa dambigiisa inta hormartay".

Malaa'igtaanna ma aha kuwa ilaalada ah, oo sidaasaa loo yiri riwaayad kale:

"إذا وافق قوله قول أهل السماء."

"Ithaa waafaqa qaw1uhu qawla ahli Al Samaa’i'
oo macneheedu yahay:

"Hadduu hadalkiisu hadalka, ehelu Samada waafaqo".

Waxaa kaloo la yiri: Waa isla Malaa'igta ilaalada. ah, oo markay ayagu Aamiin**آمين** yiraahdaan ayay Malaa'igta ayaga ka korreysaa ayaguna Aamiin**آمين** leeyihiin oo ay sidaas kuwaba kuwa uga korreeyya Aamiin**آمين** u leeyihiin ilaa ay ehelu Samada gaarto.

Malaa’igta tiraahdaa Rabbana wa laKa al xamdu\ربنا ولك الحمد

Waxaa ayaguna jirta Malaa'igta Rabbanaa wa Laka Al Xamdu**ربنا ولك الحمد** tiraahda, siday u wariyeen Maalik**مالك** iyo Bukharii**البخاري** iyo Muslim**مسلم** inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إذا قال الإمام سمع الله لمن حمده فقولوا ربنا لك الحمد، فإنه من وافق قوله قول الملائكة غفر له ما تقدم من ذنبه."

"Ithaa qaala al Imaamu Samica Allaahu liman xamidahu fa quuluu Rabbanaa Laka Al Xamdu, fa innahu man waafaqa qaw1uhu qawla Al Malaa'ikati ghufira lahu maa taqaddama min thanbihi",
oo macnihiisu yahay:

"Markuu Imaamku yiraahdo Samica Allaahu liman xamidahu**سمع الله لمن حمده** waxaad tiraahdaan: Rabbanaa Laka al xamdu**ربنا لك الحمد** , ayadoo kan hadalkiisu ku beegmo oo uu waafaqo hadalka Malaa'igta waxaa loo dhaafaa wixii horreeyey ee dambigiisa ah."

Malaa’igta u ducaysa qofka salaadda sugaya

Waxaa ayaguna jira Malaa'igta u duceysa kan Salaadda sugaya, siday Maalik**مالك** iyo Axmad**أحمد** iyo Bukhaarii**البخاري** iyo Muslim**مسلم** ay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uga wariyeen inuu yiri:

"الملائكة تصلي على أحدكم ما دام في مصلاه الذي صلى فيه ما لم يحدث: أللهم اغفر له، أللهم ارحمه."

"Al Malaa'ikatu tusalli calaa axadikum maa daama fii musallaahu allathii salla'a fiihi maa lam yaxdith: Allaahumma ighfir lahu, Allaahumma arxamhu",
oo macneheedu yahay:

"Malaa'igtu way u deceysaa axadkiinba intuu ku sugan yahay bartuu ku tukaday haddayan ama intayan waysadu ka burin, waxayna tiraahdaa: Ilaahayow dambigiisa dhaaf, Ilaahayow u naxariiso".

Riwaayad kalena waxay Abuu Daauud**أبو داود** iyo Al Nasaa'ii**النسائي** iyo Axmad**أحمد** ku ziyaadiyeen "**aw yaquuma****أو يقوم**", kaddib Axdatha**احدث** oo ah intayan weysado ka burin ama uusan bartaas sare uga kicin.

Malaa’ugta lacnadda haweenta ninkeedoo doonaya isu diida

Waxaa ayagung jira Malaa'igta lacanadda haweenta gogosha ninkeeda ka guurtay, oo ah midda intuu isu doonay isu diiday, siday u wariyeen Bukhaarii**البخاري** iyo Muslim**مسلم** iyo Axmad**أحمد,** inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إذا باتت المرأة هاجرت فراش زوجها، لعنتها الملائكمة حتى تصبح."

"Ithaa baatat al mar'atu haajarat firaasha zawjihaa, lacanathaa al Malaa'ikatu xattaa tusbixa",

oo macnihiisu yahay:

"Hadday haweentu ka guurto gogosha ninkeeda waxaa lacnadda Malaa’igta ilaa ay ka waabariisato, oo Ilaahay ka baryeysa inuu raxmadiisa ka fogeeyo".

Riwaayadda Muslim\مسلم wuxuu ku sheegay erayadaan:

"لعنتها ملائكة الذين في السماء."

"Lacanathaa Malaa'ikatu allathiina fii Al Ssamaa’i”,
oo macneheedu yahay:

"Waxaa lacnadda Malaa'igta Samada dhexdeeda ah".

Malaa'igtu intaasoo idil wax badan ayay kasii badantahay, oo intaani waa tusaale ahaan oo keli, sida Malaa’igta qorraxda u xil saaran, kuwa dabeysha u xil saaran, kuwa roobka u xil saaran, kuwa Qabriga Al Musdhafaa\المصطفى u xil saaran, Malaa’igta ummaddiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, salaantooda gaarsiisa, iyo kuwo kale oo badanba."
(4) Kaddibna qaybtii afaraad ayuu afar u qaybiyay, uuna ka kala abuuray:

Toddobada Samo

Kowaad. Wuxuu qaybta koowaad ka abuuray toddobada Samo. Maxay Samaawaatku ka samaysan yihinn? Malaa'igta degganna waa kuwee? Samo kasta waa dhismo la mid ah dhismaha arligaan, oo leh dhul iyo buuro iyo bado iyo wabiyo iyo dhir iyo Malaa'ig deggan iyo wuxuu Ilaahay ogyahay. Bal marka aan mid mid wax uga tilmaanno.

Samada Koowaad

Kow. **Samada Koowaad.** Waxaa la wariyay inay Samada nasoo xigta oo la yiraahdo Al Samaa'u Al Dunyaa**السماء الدنيا,** oo macneheedu yahay Samada dhow ama Samada hooseysa, ay ka sameysan tahay biyo iyo dukhaan oo ah uumi.

Waaba ayada uu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa**الله سبحانه وتعالى**, Aayadda kow iyo tobnaad ee Suuratu Fussilat**سورة فصلت** ku yiri:

ثُمَّ اسْتَوَى إِلَى السَّمَاءِ وَهِيَ دُخَانٌ

"**Thumma istawaa ilaa Al Samaa'i wa hiya dukhaanun",**
oo macneheedu yahay:

"Markaas kaddib ayuu u qasday Samada ayadoo qiiq ah".

Wuxuu Cuthmaan bin Saciid Al Daarimii**عثمان بن سعيد الدارمي** Cabdu Allaahi ibnu Cumar **عبد الله بن عمر**\ ka wariyay inuu yiri:
"Markuu Ilaahay doonay inuu ashyaada abuuro, ayadoo uu Carshigiisuna biyo korkooda yahay, ayanna Samo jirin, wuxuu abuuray dabaysha oo uu markaas ku salliday oo uu ku diray biyaha.

Markaasey biyihii ruxmeen oo ay hirar yeesheen, tiirarkiisana ay saameysay. Markaasaa waxaa biyaha kasoo baxay
(1) uumi iyo
(2) dhoobo iyo
(3) dumaa’ ama daadxoor.

Markaasuu uumigu inta kor u kacay sare ahaaday oo uu batay oo koray: markaasuu wuxuu ka abuuray Samada.

Dhoobadana wuxuu ka abuuray toddobada arli.

Dumaa'dana ama daadxoorka, oo ah waxaa biyaha socda kor heehaaba oo ah ama geedo ama caleemo baaliyoobay ama xumbo iyo wixii la midka ah, wuxuu ka abuuray buuraha."

Ibnu Al Munthir**إبن المنذر** iyo ibnu Jariir**إبن جرير** waxay Cabdu Allaahi ibnu Mascuud **عبد الله إبن مسعود** ka wariyeen, iyo dad kale oo saxaabada ka mid ahba in markuu Ilaahay doonay inuu khalqiga abuuro uu biyaha uumi kasoo saaray. Markaasuu uumigu hiyaha ka kor maray oo uu ka sare maray: sare maridda waxaa af Carbiga lagu yiraahdaa samaa**سما**. Markaasuu wuxuu u bixiyay Samaa'a**سماء**.

Samadaan waxaa ku sugaan dhexdeeda Malaa'ig laga abuuray biyo iyo riix oo dabayl ah, uuna madax u yahay Malag la yiraahdo Al Racdu**الرعد**, ahna Malagga u xilsaaran daruuraha iyo roobka.

Waxay Axmad**أحمد** iyo Al Tarmathii**الترمذي** iyo Al Nasaa'ii**النسائي** ay ka wariyeen Ibnu Cabbaas **إبن عباس** Xadiith saxiix ah, uuna ku yiri:

"أقبلت يهود إلى رسول الله صلى الله عليه وسلم فقالت: "أخبرنا ما هذا الرعد؟" قال: "ملك من ملائكة الله موكل بالسحاب، بيديه مخراق من نار يزجر به السحاب، يسوقه حيث أمر الله." قالوا: "فما هذا الصوت الذي نسمع؟" قال: "صوته." قالوا: "صدقت."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Yuhuud ayaa waxay u timid Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxayna tiri: ”Waxaad noo sheegtaa muxuu yahay Al Racdu, oo ah unkadka la maqlo markuu roob da'ayo?"
Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:
"Malakun min Malaa'ikati Allaahi muwakkalun bi al ssaxaabi, bi yadihi mikhraaqun min naarin yazjaru bin al ssaxaaba, yasuuquhu xaythu amara Allaahu".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waa Malag ka mid ah Malaa'igta Ilaahay oo u xilsaaran daruuraha, gacantiisana uu ku jiro shaabuug dab ah oo uu ku kaxeynayo, kuna canaananayo kuna reebayo daruuraha, uuna u kexeynayo meeshuu Ilaahay amray."
Waxay yiraahdeen:
"Hadaba muxuu yahay dhawaaqaan aan maqalno?"
Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:
"Waa codkiisa".
Waxay yiraahdeen:

"Run ayaad sheegtay".

Malag Al Racdu\الرعد iyo Malaa'igtaan uu madaxda u yahay waxay leeyihiin:
"Subxaana Thii Al Mulki wa Al Malakuuti\سبحان ذي الملك والملكوت", oo macneheedu yahay: "Waxaa ceeb iyo naaqusnimo iyo baahi iyo xumaan oo idil ka nazahan oo ka fiyow oo ka hufan Midka Boqortooyada iyo Malakuutka iska leh".

Waxaa kaloo ibnu Cabbaas\إبن عباس laga wariyay inuu yiri:

"الرعد ملك يسوق السحاب بالتسبيح، كما يسوق الحادي الإبل بحدائه."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Al Racdu\الرعد waa Malag daruuraha Tasbiix\تسبيح ku kaxeeya, sida uu ninka geela u heesaya uu geela heeskiisa ugu wado".

Sidaas ayuu gacaniisana karbaash dab ah ku sitaa uu daruuraha ku kaxeynayo, afkiisana markuu kaxeynayo uu tasbiix\تسبيح ku wadaa.

Jaabir\جابر waxaa laga wariyay in Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga wareystay dhalashada daruuraha, oo uu markaas yiri:

"إن ملكا موكل بالسحاب يلم القاصية و يلحم الدانية، في يده مخراق، فإذا رفع برقت، وإذا زجر رعدت، وإذا ضرب صعقت."

"Inna Malakan muwakkalun bi al ssaxaabi yalummu al qaasiyata wa laxama al ddaaniyata, fii yadihi mikhraaqun, fa ithaa rafaca bariqat, wa ithaa zajara racadat, wa ithaa daraba saciqat (saad)".
Xadiithka manihiisu waxaa weeye:

"Malag daruuraha loo xil saaray wuxuu kulminayaa kuwa daruuraha fog, wuxuuna. ku laxaamadayaa kuwa dhow. Gacantiisa waxaa ku jira shaabuug: hadduu kor u qaado waa hillaaceysaa, hadduu reebo oo uu canaantana way unkadaysaa, hadduu ku dhuftana waxay dhalineysaa biriq."

Cumar bin Bijaad\عمر بن بجاد wuxuu wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إسم السحاب عند الله العنان، والرعد ملك، والبرق طرف ملك يقال له روقيل."

"Ismu al saxaabi cinda Allaahi Al Canaanu, wa Al Racdu Malakun, wa al barqu dharfu malakin yuqaalu lahu Ruuqiil".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay agtiisa daruuraha waxaa lagu magacaabaa Al Canaanu\العنان. Al Racduna\رعد waa Malag. Hillaacuna waa isha Malag la yiraahdo Ruuqiil\روقيل."
Xadiithkaan iyo midka ka horreyaba waxaa wariyay ibnu Marduwayh\إبن مردويه.

Abuu Al Shayk\أبو السيخ wuxuu wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"خلق الله السماء الدنيا، فجعلها سقفا محفوظا، وجعل فيها حرسا شديدا وشهبا، ساكنها من الملائكة أولوا أجنحة مثنا وثلاث ورباع في صورة البقر، مثل عدد النجوم، لا يفترون من التسبيح والتهليل والتكبير."

"Khalaqa Allaahu Al Ssamaa'a al Ddunyaa, fa jacalahaa saqfan maxfuuthan, wa jacala fiihaa xarasan shadiidan wa shuhuban, saakinuhaa mina al Malaa'ikati uuluu ajnixatin mathnaa wa thalaatha wa rubaaca fii suurati al baqari, mithla cadadi al nnujuumi, laa yaftaruuna mina al tasbiixi wa al tahliili wa al takbiiri."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay wuxuu abuuray Samadaan dhow, markaasuu wuxuu arliga uga dhigay saqaf ilaaliya, wuxuu dhexdeeda yeelay askar ilaalisa oo xoog badan iyo dambaaburo holcaya. Malaa'igta degganna waxay leedahay labo ama saddex ama afar baal, waxayna leeyihiin suuradda ama muuqaalka lo'da, tiradooduna waxay la mid tahay tirada xiddigaha, mana ay joojinayaan. oo ma goynayaan tasbiixda. (oo ah inay yiraahdaan Subxaana Allaahi\سبحان الله), iyo tahliisha. (oo ah inay yiraahdaan laa ilaaha. illaa Allaahu\لا إله إلا الله) iyo takbiirta (oo ah inay yiraahdaan Allaahu Akbaru\ألله أكبر)".

Samada Labaad

Labo. **Samada Labaad.** Samada labaadi waxay ka sameysan tahay marmar cad**,** siday u wariyeen ibnu Raahiweyh\إبن راهويه iyo Abii Al Shaykh\إبي الشيخ iyo Al Dhabraanii\الطبراني iyo ghayrkoodba, ugana wariyeen Anas\أنس iyo inay Samadaas dhexdeeda ku sugan yihiin Malaa'ig noocyo kala duwan ah, lehna sifooyin kala duwan, kuna mashquulsan cibaadooyinka kala duwan oo la amray.

Malaa'igtaani cod dheer ayey waxay ku leeyihiin:
"Subxaana Thii Al Cizzati wa Al Jabaruuti\سبحان ذي العزة والجبروت" oo macneheedu yahay: "Subxaanaha Midka Cizzada u saaxiibka oo lagama adkaadaha ah, xooggana badan, wax walbana. kara".

Tirada Malaa'igta Samadaan labaad deggan waxay la mid tahay dhibcaha roobka oo kale, waxayna leeyihiin suuradda gorgorka, ma daalaan, mana joojiyaan ammaanta Ilaahay, mana seexdaan.

Samadaan labaad ayay daruuruhu kasoo askumaan, markaasey kuwaas caabudidda ku mashquulsan hoostooda kasoo baxaan, markaasey hawada Samadaan ku faafaan. Waxaana la socota Malaa'ig u duwaya xagga la amro, kuwaasoo codkoodu tasbiix\تسبيح yahay, boohintooduna cabsiin.

Samada Saddexaad

Saddex. Samada Saddexaad. Samada saddexaad waxay ka samaysan tahay bir, waxaana dhexdeeda ku sugan Malaa'ig baalal leh iyo wajiyo kala duwan, oo uu muuqaalkoodu kala duwan yahay, codad dheerna ku tasbiixsanaya oo oranaya:

"Subxaanaka Allaahumma, Anta Al Xayyu Allathii laa tamuutu **سبحانك أللهم أنت الحي الذي لا تموت**\" oo macneheedu yahay: "Subxaanaka Ilaahayow: Adigu waxaad tahay Midka Nool oo aadan dhimanayn."

Malaa'igtaani waxay u taagan tahay safaf, sida ayagoo ah dhismo la isku dhejiyay, uusanna midkood aqoon nooca midka ku xigah, cabsi ay Ilaahay ka qabaan daraadeed, uusanna midkood midka kale wajigissa dhuganayn ilaa Maalinta Qiyaame. Malaa'igta Samadaan saddexaad deggan tiradoodu waxay la mid tahay tirada bacaadka, muuqaalkooduna waa suuradda Basharka dadka Banii Aadanka oo kale, habeen iyo maalinba la xasharinayo.

Samada Afaraad

Afar. Samada afaraad. Samada afaraad waxay ka samaysan tahay nuxaas, waxaana dhexdeeda ah Malaa'ig ka tira badan kuwa ah Samada saddexaad dhexdeeda.

Sidaas ayay Sama walba ka Malaa'ig badan tahay midda ka hooseysa oo ku xigta. Malkaa'igta Samadaan afaraad way taagan yihiin, waana. rukuucsan yihiin waana sujuudsan yihiin, kuna mashquul sanyihiin cibaadooyin kala duwan. Ilaahay mid ayaga ka mid ah ayuu wuxuu u dirsadaa amar umuurtiisa ka mid ah, markaasuu Malaggu tegeyaa oo uu soo qabanayaa waxaas loo diray, kaddibna uu soo noqonayaa, isagoo aan aqoon Malagga dhiniciisa xiga, ayna u sab tahay sida adag oo qotada dheer oo ay u cibaadeysanayaan, ayagoo leh:

"Subbuuxun Qudduusun Rabbunaa Al Rraxmaanu Allathii laa ilaaha illaah Huwa **سبوح قدوس ربنا الرحمن الذي لا إله إلا هو**\" oo macneheedu yahay: "Waa nazahanyahay waana ka daahir xumaan iyo ceeb kasta Rabbigeen Al Raxmaanu, Midka uusan jirin ilaah aan Isaga ahayn".

Tirada Malaa'igta Samadaan afaraad deggan waxay la mid tahay tirada caleemaha geedaha oo, kale, waxayna u safan yihiin ayagoo garbaha isku haya, suuraddooduna ay tahay midda Xuuru Al Ciini**حور العين** oo kale, ayna yihiin qaar rukuucsan iyo kuwo sujuudsan, ayagoo ay wajiyadoodu birqayaan, kuna tasbiixsanaya inta u dhexeysa toddobada Samo iyo toddobada arli.

Samada Shanaad

Shan. Samada Shanaad. Samada shanaad waxay ka samaysan tahay qalin ama fiddo, Malaa'igta dhexdeeda ahna way ka badan yihiin Malaa'igta afarta Samo oo kale oo la isku daray, wayna rukuucsan yihiin, sujuudsan yihiin, ayagoo aan indhohooda kor u qaadeyn ilaa Maalinta Qiyaame.

Marka la gaaro Maalinta Qiyaame waxay oranayaan:
"Rabbigeenow, kuma aanan caabudin sidaad xaqqa u lahayd", oo sidaas ayay gaabinta ay gaabiyeen uga cudur daaranayaan, muujinayaanna Waynaantiisa iyo siduu ugu nicmeeyey, ayadoo uusanna axadna awoodin inuu Ilaahay ugu shukriyo si u dhigantah nicmada uu siiyey oo

uu ugu nicmeeyey. Tirada Malaa'igtaan Samada shanaad waxay ka badan tahay tirada khalqiga intiisa kale oo idil, suuraddoodana waa suuradda dadka Banii Aadanka ah.

Malaa'igtaan waxaa ka mid ah Al Kiraamu Al Bararati**الكرام البررة** iyo Al Culamaa'u Al Safarati**العلماء السفرة**, oo ah kuwa ku xusan Aayadaha shan iyo toban iyo lix iyo toban ee Suuratu Cabasa**سورة عبس**:

بِأَيْدِي سَفَرَةٍ (15) كِرَامٍ بَرَرَةٍ (16)

"Bi aydii Safaratin(15)**Kiraami bararatin**(16)**"** oo macnohoodu yahay: ”Oo ay gacanta ku hayaan Malaa'ig wax qorta(15)Sharafna leh oo baarri ah(16)".

Samada Lixaad

Lix. **Samada Lixaad.** Samada lixaadi waxay ka samaysan tahay dahab, waxaana dhexdeeda ah jundiga waa askarata Ilaahay ee wayn, ahna Malaa'igta la yiraahdo Al Karuubiyuuna**الكروبيون.**

Al Xulaymii**الحليمي** wuxuu yiri: waa Malaa'igta cathaabta oo magacoodu wuxuu ka yimid Al karbu**الكرب** oo ah kurbada. Al Qaamuusna**القاموس** wuxuu wariyay: Al Karuubiyuuna**الكروبيون** waa madaxda Malaa'igta, waxaana ka mid ah Jibriil**جبريل** iyo Miikaa’iil**ميكائيل** iyo Israafiil**إسرافيل**, waana kuwa Ilaahay dhoweeyey, oo eraygu wuxuu ka yimid karaba**كرب** oo, macneheedu yahay waa dhoweeyey.
Tirada Malaa'igtaan Ilaahay Tacaalaa keliya ayaa ogsoon, waxaana u madax ah Malag leh toddobaatan kun oo jundi ama askari, oo mid walba oo ayagaas ka mid ihi uu isaguna leeyahay toddobaatan kun oo jundi. Malaa’igtaani waa kuwa uu Ilaahay umuurtiisa ehelka adduunkaan usoo dirsado. Codad dheer ayay ku tasbiixsadaan kuna tahliishadaan.

Ibnu Al Munthir**إبن المنذر** wuxuu ibnu Cumar**إبن عمر** ka wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"الملائكة عشر أجزاء، تسعة أجزاء الكروبيون الذين يصاحبون الليل والنهار، لايفترون. وجزء قد وكلوا بخزانة كل شيء وما في السماء وضع إبهام إلا فيه ملك ساجد، أو ملك راكع."

"**Al Malaa'ikatu cashara ajzaa'in, tiscatu ajzaa'in Al Karuubiyuuna allathiina yusabbixuuna al layla wa al nnahaara, la yaftaruuna. Wa juz'un qad wukkiluu bi khazaanati kulli shay'in wa maa fii Al Ssamaa'i wadcu ihaabin illaa fiihi Malakun saajidun, aw Malakun raakicun".**
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Malaa'igtu waa toban qaybood, oo sagaal qaybood waa Al Karuubiyuuna**الكروبيون**, kuwa habeen iyo maalinba tasbiixsada oo aan joojin. Iyo qayb tobanaad oo loo wakiishay oo loo xilsaaray maamulka iyo adeegga shay kulligiis. Mana jirto Samada dhexdeeda saan ama sar xoolaad, waa haraggee in le'eg oo waa illaa meesha uu ku sugan yahay Malag sujuudsan ama Malag rukuucsan."

Malaa'igta Samadaan lixaad dhexdeeda ahi waa Xizbu Allaahi Al Ghaalibu wa Jundu Allaahi Al Acthami**حزب الله الغالب وجند الله الأعظم**, oo ah xizbiga Ilaahay oo mar walba adkaada iyo jundiga Ilaahay ee wayn. Suuradooduna waa fardaha calaamdaysan (oo wajiga iyo lugaha midabka cad ku leh).

Samada Toddobaad

Toddoba. Samada Toddobaad. Samadaan toddobaadi waxay ka samaysan tahay xabbad yaaquut ah oo guduudan, Malaa'igta dhexdeeda ahna way ka tira badan yihiin kuwii hore loo soo sheegay, waxaana u madax ah Malag horjooge u ah toddoba boqol oo kun oo Malag, ayna ka mid yihiin askar tiradoodu ay dhibcaha roobka Samada la mid yihiin iyo ciidda arliga iyo bacaadka iyo quruuruxa iyo caleenta geedaha iyo tirada shay' kasta oo lagu abuuray Samaawaatka iyo arligaba.

Ilaahayna wuxuu maalin walba abuuraa wixii uu doono, waana Isagaba yiri:

وَمَا يَعْلَمُ جُنُودَ رَبِّكَ إِلَّا هُوَ

"Wa maa yaclamu junuuda Rabbika illaa Huwa(31)**"** oo ah Aayadda kow iyo soddonaad ee Suuratu Al Mudath-thir**سورة المدثر**,
oo macneheedu yahay:

"Wax og junuudda Rabbigaa oo aan Isaga ahaynna ma jiro(31)".

Malaa'igta Samadaan toddobaad dhexdeeda ah waa Malaa'igta Al Muqarrabuuna**المقربون**, kuwa la soo dhoweeyey, kuwa acmaasha ku dhiga uurka kutubbada, khayraatkana ilaaliya. Samada toddobaad korkeeda waxaa ah Malaa'igta la yiraahdo Xamalatu Al Carshi Al Karuubiiyuuna **حملة العرش الكروبيون**\, kuwa Carshiga Rabbi xambaarsan.

Toddobada arli

Labaad. Qaybta labaadna ee nuurkaas wuxuu Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى**\ ka abuuray toddobada arli, kuwaanoo Samaawaatka hortood la abuuray, siduu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa **الله سبحانه وتعالى**\ ugu qeexay Aayadaha sagaalaad ilaa laba iyo tobnaad ee Suuratu Fussilat **سورة فصلت**\, uuna ku yiri:

قُلْ أَئِنَّكُمْ لَتَكْفُرُونَ بِالَّذِي خَلَقَ الْأَرْضَ فِي يَوْمَيْنِ وَتَجْعَلُونَ لَهُ أَنْدَادًا ذَلِكَ رَبُّ الْعَالَمِينَ (9) وَجَعَلَ فِيهَا رَوَاسِيَ مِنْ فَوْقِهَا وَبَارَكَ فِيهَا وَقَدَّرَ فِيهَا أَقْوَاتَهَا فِي أَرْبَعَةِ أَيَّامٍ سَوَاءً لِلسَّائِلِينَ (10) ثُمَّ اسْتَوَى إِلَى السَّمَاءِ وَهِيَ دُخَانٌ فَقَالَ لَهَا وَلِلْأَرْضِ ائْتِيَا طَوْعًا أَوْ كَرْهًا قَالَتَا أَتَيْنَا طَائِعِينَ (11) فَقَضَاهُنَّ سَبْعَ سَمَوَاتٍ فِي يَوْمَيْنِ وَأَوْحَى فِي كُلِّ سَمَاءٍ أَمْرَهَا وَزَيَّنَّا السَّمَاءَ الدُّنْيَا بِمَصَابِيحَ وَحِفْظًا ذَلِكَ تَقْدِيرُ الْعَزِيزِ الْعَلِيمِ (12)

"Qul a'innakum la takfuruuna bi Allathii khalaqa al arda fii yawmayni wa tajcaluuna Lahu andaadan Thaalika Rabbu Al Caalamiina(9)**Wa jacala fiihaa rawaasiya min**

fawqihaa wa baaraka fiihaa wa qaddara fiihaa aqwaatahaa fii arbacati ayyaamin sawaaan lil ssaa'iliina(10)**Thumma istawaa ilaa Al Ssamaa'i wa hiya dukhaanun fa qaala lahaa wa lil ardi a'atiyaa dhawcan aw karhan qaalataa a'ataynaa dhaa'iciina**(11)**Fa qadaahunna sabca Samaawaatin fii yawmayni wa awxaa fii kulli Samaa'in amrahaa wa zayyannaa Al Ssamaa'a al ddunyaa bi masaabiixa wa xifthan thaalika taqdiiru Al Caziizi Al Caliimi**(12)**".**
Aayadaha macnohoodu waxaa weeye:

"Waxaad. tiraahdaa (Nabiyow) idinku ma waxaad ku kufrineysaan Midka ku abuuray arliga laba maalmood, oo aad u yeeleysaan kuwo la mid ah? Kaasi waa Rabbiga Caalamiinta(9)Wuxuuna yeelay arliga dhexdiisa buuro wuuna barakeeyey dhexdiisa, una qaddaray cunnadiisa afar maalmood, ayadoo ay u simantahay dadka weydiinaya(10)Markaasuu u qasday Samada oo qiiq ah kuna yiri: "Cirka iyo arliga ahaada, adinkoo adeecsan ama la khasbay", waxayna yiraahdeen: waan nimid annagoo adeecsan(11)Markaasuu wuxuu ka abuuray cirka toddoba Samo laba maalmood dhexdooda, wuxuuna faray Samo kasta amarkeedii, waxaanna ku qurxinnay Samada dhow misbaaxyo, waana ilaalinnay, taasina waa qadaridda Midka Adkaada oo wax walba u Cilmi leh(12)."

Tirada arligana wuxuu Cazza wa Jalla\عز وجل Aayadda labo iyo tobnaad ee Suuratu Al Dhalaaq \سورة الطلاق noogu sheegay:

اللَّهُ الَّذِي خَلَقَ سَبْعَ سَمَوَاتٍ وَمِنَ الْأَرْضِ مِثْلَهُنَّ

"Allaahu Allathii khalaqa sabca Samaawaatin wa mina al ardi mithlahunna(12)**".**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Ilaahay waa Kan abuuray toddobo Samo, arligana tiradaas oo kale". Lixda arli oo kale waxay kasii kala hooseeyaan midkaan aan annagu korkiisa ku nool nahay. Wa Al Xamdu Li Allaahi.
Intaasaan uga baxaynnaa warkaan kasoo qaadannay Al Zarqaanii\الزرقاني, dambigiisa Allaha dhaafee, una naxariistee.

Tiirka saddexaad waa rumaynta Kutubta Ilaahay

Tiirka saddexaad ee iimaanku waa inaad rumaysid Kutubta Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa الله سبحانه وتعالى, uu soo dejiyay oo idil, ayna ka mid yihiin Quraanka Kariimka ah oo Nabi Muxammad, Sallallaahu Calayhi Wasallam, lagu soo dejiyay saddex iyo toban sano Hijrada horteed isagoo jooga Makkah, Injiil\الإنجيل oo Nabi Ciise\عيسى, Calayhissalaamu , qiyaas laba kun oo sano ka hor lagu soo dejiyay isagoo Falasdhiin\فلسطين joogah , Tawraadda\التوراة, oo Nabi Muuse\موسى, Calayhissalaamu, lagu soo dejiyay kun iyo toddoba boqol oo sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhim Wasallam, isagoo jooga dalka Masar\مصر, Zabuur\الزبور, oo Nabi Daauud\داود, Calayhissalaam, lagu soo dejiyay kun iyo shan boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo joogah dalka Falasdhiin\فلسطين, iyo Suxuftii Nabi Ibraahiim\إبراهيم, Calayhissalaatu Wassalaamu, lagu soo dejiyay saddex kun iyo afar boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo joogah dalalka Ciraaq\عراق, Siiriya\سوريا, Falasdhiin\فلسطين, Masar\مصر iyo Makkah al-Mukarramah\مكة المكرمة.

Tiirka afaraad waa rumaynta Rususha Ilaahay

Tiirka afaraad ee iimaanku waa inaad rumaysid Rususha Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, uu soo diray oo idil. Rusushaas uu soo diray, Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaaالله سبحانه وتعالى, qaarkood magacdooda Quraanka ayuu noogu sheegay, waxayna yihiin

(Kow) Nabi Muxammad\محمد, Sallaa Allaahu Calyhi Wasallam.

(Labo) Nabi Aadan\آدم , Calayhissalaamu, oo noolaa qiyaas shan kun iyo shan boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Nabi iyo Rasuulna u ahaa dhashiisa.

(Saddex) Nabi Idriis\إدريس, Calayhissalaamu, oo ah Nabiga ugu horreeyey Aadanآدم dabadiis. Waxaa la sheegay inuu Idriisإدريس ku dhashay magaalada Memfi ee dalka Masara oo ayagaas loo diray. Si kalena waa la yiri.

(Afar) Nabi Nuux\نوح, Calayhissalaamu, oo dhashay boqol iyo lix iyo labaatan sano kaddib dhimashada Nabi Aadanآدم . Waxaana loo diray dadkiisa Ciraaq\عراق degganaaa oo la oran jiray Banuu Raasib\بنو راسب, magaalo madaxdooduna ay ahayd Shuurbaak\شورباك oo dalka Ciraaq\عراق ku taalla.

Magaaladiisu Shuurbaakشورباك badna kuma taallo iyo wabi toona, taas ayaana u sabab ah inay gaalada tolkiis ku qoslaan inuu halkaas doon ku dhiso.

(Shan) Nabi Huud\هود, Calayhissalaamu, oo uu Nuuxنوح u yahay awoowaha labaad. Huud هود waxaa loo diray dadka Carabta ah ee reer Caad\عاد oo degi jiray Al Axqaaf\الأحقاف, kuna beegan gobolka Xadramuut\حضرموت ee dalka Yaman\يمن iyo dalka Cummaan\عمان.

(Lix) Nabi Saalix\صالح, Calayhissalaamu. Saalix waxaa loo diray dadka Carabta ah oo ka farcamay muslimiintii reer Caad\عاد oo la yiraahdo Thamuudثمود, degi jirayna Al Xijru\الحجر, oo Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة waqooyigeeda ku taallaa, aniguna waan dul istaagay, Ilaahay mahadi ha ka gaartee.

(Toddoba) Nabi Ibraahiim\إبراهيم, Calayhissalaamu, oo noolaa saddex kun iyo afar boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Ibraahiimإبراهيم waxaa loo diray ummado badan ayna ugu horreyso dadka Ciraaq\عراق degganaa oo ay caasimaddoodu Baabi\بابل ahayd, uuna boqor u ahaa Namruud ibnu Kancaan bin Xaam bin Nuux\نمرود إبن كنعان بن حام بن نوح.

Boqorka Masar\مصر oo uu Nabi Ibraahiimإبراهيم u tegeyna, kaddib marka haweentiisa Saarrah \سارة inta laga xaday boqorkaas gurigiisa la geeyey, magaciisu wuxuu ahaa, siduu Al Dhabarii \الطبري yiri Sinaanu bin Culwaana\سنان بن علوان, uuna Ibraahiimإبراهيم islaamka ugu yeeray, kanna ka diiday. Ibnu Hishaamna\إبن هشام wuxuu ku yiri Al Tiijaani\التيجان inuu magaciisu ahaa Camr bin Imri'u Al Qaysi bin Baabilyuun bin Saba'a\عمرو ين إةرأ القيس بن بابليون بن سبأ. Labdaasba waxaa wariyay Al Suhaylii\السهيلي.

(Sideed) Nabi Luudh\لوط, Calayhissalaamu, oo uu Ibraahiim**إبراهيم** adeer u ahaa isagoo uu dhalay walaalkiis Haaraan bin Aaazar**هاران بن آزر,** ayna isku zaman noolaayeen.
Luudh**لوط** waxaa loo diray ilaa shan degmo oo ku oolli jiray bartay hadda ku taallo Badda Maydka ah ee arliga Falasdhiin**فلسطين,** oo la halaagay markay camalka qawmu luudh hindiseen. Degmooyinkaas waxaa ka mid ahaa Saduuma**سدوم** iyo Ghamuuraa'a**غموراء**, haddana baddaas hoosteeda ah.

(Sagaal) Nabi Ismaaciil ina Ibraahiim**إسماعيل بن إبراهيم** oo Nabi ahaa laba kun iyo saddex boqol iyo sideetan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Ismaaciil waxaa loo diray dadka degah Tihaamah**تهامة** oo ah Xijaaz**الحجاز** iyo Yaman**يمن** iyo gobollada halkaas ku yaalla. Hooyadiisna waa Haajar**هاجر**, oo masriyad**مصرية** ayay ahayd.

(Toban) Nabi Isxaaq ina Ibraahiim**إسحاق بن إبراهيم,** Calayhimussalaamu, waana Ismaaciil **إسماعيل** walaalkiis ay isku aabe yihiin, kalase hooyo, oo Isxaaq**إسحاق** waxaa dhshay ina adeerta Ibraahiim haweentiisa Saarrah**سارة.**
Isxaaq**إسحاق** waxaa loo diray dadka Falasdhiin**فلسطين** iyo gobolkaas degi jiray, waxayna isku zaman yihiin walaalkiis Ismaaciil**إسماعيل**.

(Kow iyo toban) Nabi Yacquub\يعقوب, Calayhissalaamu, waana ina Isxaaq bin Ibraahiim Khaliilu Al Rraxmaani**إسحاق بن إبراهيم خليل الرحمن.**
Yacquub**يعقوب** waa isla Nabi Israa'iil**إسرائيل**, waxaana Yacquub**يعقوب** loogu bixiyay isagoo ahaa mataanka Cays**عيص** oo midkaan ciribtiisa ku joogay oo caqab waa ciribta. Yacquub**يعقوب** wuxuu noolaa isla waqtiga aabihiis Isxaaq**إسحاق**.
Yacquub**يعقوب** waa aabaha dhalay laba iyo tobanka wiil oo ay ka farcameen laba iyo tobanka qabiil ee reer Banuu Israa'iil**بنو إسرائيل.**

(labo iyo toban) Nabi Yuusuf\يوسف, Calayhissalaamu, waana ina Nabi Yacquub bin Isxaaq bin Ibraahiim**يعقوب بن إسحاق بن إبراهيم.**
Yuusuf**يوسف** wuxuu noolaa laba kun iyo sideed boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Yuusuf**يوسف** waxaa loo diray Fircoonka Masar**مصر** (oo uu Al Suhaylii**السهيلي** yiri magaciisu wuxuu ahaa Al Rrayyaanu bin Al Waliidu **الريان بن الوليد.** Fircoonka Muusena**موسى** waxaa la oran jiray Al Waliidu bin Muscab **الوليد بن مصعب**), kaddibna, siduu Ilaahay Quraanka noo sheegay wxuuba noqday boqorka Masar**مصر**, kaddib markuu Fircoonkiisu islaamay.

(Saddex iyo toban) Nabi Ayyuub\أيوب, Calayhissalaamu, oo noolaa qiyaas laba kun iyo sideed boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Si kalena waa la yiri. Waxaana loo diray roomaanka, ayaguuna ka dhashay.
Al Nawawii**النووي** wuxuu Tahthiibu Al Asmaa'i**تهذيب الأسماء و اللغات** ku sheegay inay degmadiisu ahayd magaalada Xawraan**حوران**, halkaasna uu qabrigiisu ku yaallo tuulada Nawaa**نوى** agteeda, hlakaasoo uu masjid ugu yaallo. Xawraan**حوران** amaa Xaaraan**حاران** waa gobol ku yaalla arliga Suuriya**سوريا** koobayana deegaanka ay taallo Cammaan**عمان**, caasimadda Urdun**إردن** ahna caasimadda gobolka la yiraahdo Al Balqaa'**البلقاء** iyo Dimishq**دمشق,** siduu Al Balaadii**البلادي** u sheegay.

(Afar iyo Toban) Nabi Muuse\موسى, Calayhissalaamu, oo noolaa qiyaas kun iyo toddoba boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Muuseموسى waxaa loo diray Fircoonka Masar oo magaciisu ahaa Al Waliidu bin Muscab\الوليد بن مصعب.

(Shan iyo toban) Nabi Haaruun\هارون, Calayhissalaamu, oo ahaa Muuseموسى walaalkiis ay isku hooyo iyo isku aabe yihiin, waxayna wada noolaayeen isku zaman.

(Lix iyo toban) Nabi **Shucayb**\شعيب, Calayhissalaamu, oo noolaa zamnka Muuseموسى, loona diray dadka degi jiray Madyan\مدين, oo hadda ku taallaa waqooyiga boqortooyada Sucuudiga, xagga Al Madiinah Al Munawwarah\المديمة المنورة waqooyigeeda.
Muuseموسى ayaaba guursaday, siduu Ilaahay Quraanka noogu sheegay, gabadha Shucaybشعيب, kaddib markuu toban sano ariga u raacay, taasoo meherkeeda ahayd. Madyan\مدين wuxuu ahaa in Nabi Ibraahiim\إبراهيم oo ahaa kan ugu horreeyey oo bartaas dega. Anigu waan dul istaagay Madyan\مدين Ilaahay mahadi ha ka gaartee.

(Toddoba iyo toban) Nabi Daauud\داود, Calayhissalaamu, oo noolaa kun iyo shan boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Daauudداود wuxuu degganaa Falasdhiin\فلسطين waxaana loo diray Banuu Israa'iil\بنو أسرائيل.

(Sideed iyo toban) Nabi Sulaymaan\سليمان, Calayhissalaamu, ina Nabi Daauudداود. Sulaymaanسليمان waxaa loo diray Banii Israa'iilبنو أسرائيل.

(Sagaal iyo toban) Nabi Zakariyyaa\زكريا**,** Calayhissalaamu**.** Zakariyyaaزكريا waxaa loo diray Banuu Israa'iilبنو أسرائيل wuxuuna noolaa shan boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalshada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaana dishay yuhuudda kaddib markuu dhashay Ciise ina Maryama\عيسى إبن مريم ayna yiraahdeen isagaa ka dhalay guur la'aan, taasoo been ah, Nabina uuba macsuum yahay.

(Labaatan) Nabi Yaxyaa ina Zakariyyaa\يحيى بن زكريا, dhashayna shan boqol iyo toddobaatan sano qiyaas ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Yaxyaaيحيى waxay isku mar dhasheen oo isku mar Nabi iyo Rasuul wada ahaayeen Nabi Ciise ina Maryamaعيسى إبن مريم Calayhimussalaamu. Qaraabana way ahaayeen.

(Kow iyo labaatan) Nabi Ciise ina Maryamaعيسى إبن مريم, Calayhissalaamu, oo noolaa dhashayna shan boqol iyo toddobaatan sano qiyaas ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Nabi Ciiseعيسى waxaa loo diray reer Banuu Israa'iilبنو أسرائيل ee arliga Falasdhiin\فلسطين.
(Labo iyo labaatan) Nabi Ilyaas,\إلياس Calayhissalaamu**.**

(Saddex iyo labaatan) Nabi Al-Yasac\اليسع, Calayhissalaamu.

(Afar iyo labaatan) Nabi Yuunus bin Mattaa\يونس بن متى, Calayhissalaamu. Yuunus**يونس** waxaa loo diray dadka degi jiray Niinawaa**نينوي** ee waqooyiga Ciraaq**عراق**. Waxaa dadka degganaa Niinaawaa**نينوي** oo loo diray ka mid ahaa Caddaas**عداس** oo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hortiisa ku islaamay oo raacay markuu Al Dhaa'if**الطائف** tegey.

Tiirka shanaad waa rumaynta Maalinta Aakhiro

Qaybta shanaad ee iimaanka waa inaad rumaysid Maalinta Aakhiro in markii dadka oo idil uu dhinto, qabriga lagu wareysan doono, kaddibna uu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa **الله سبحانه وتعالى**, dadka soo wada nooleyn doono, la soo wada shirin doono, oo markaas qof walba wixii uu ku hadlay iyo wixii uu falay intuu adduunkaan ku noolaa lagula xisaabtami doono, markaas kaddibna dadka laba daarood loo kala wadi doono, kuwaasoo kala ah Janno iyo Naar. Iyo inaad rumaysid waxa Maalintaas ku saabsan oo idil. Bani Aadan oo dhan meesha Maalintaas lagu shirin doono waa Baytu Al Maqdis**بيت المقدس** ee dhulka maanta Falasdhiin**فلسطين** loo yaqaan.

Tiirka lixaad waa rumaynta Qadarka\القدر, khayrkiisa iyo sharkiisaba.

Qaybta lixaad ee iimaanku waa inaad rumeysaa Qadarka**القدر**, khayrkiisa iyo sharkiisabee.

Haddana waxaan dib ugu laabaneynnaa tafsiirka Aayadda saddexaad:

"Muttaqiintu**المتقين** waa kuwa aamina oo rumeeya waxaa araggooda ka maqan oo ayan u jeedin (Sida Ilaahay Cazza wa Jalla**الله عزوجل**, Malaa'igta, Rususha, Kutubbadii hore, Maalinta Aakhiro, oo lixda tiir oo iimaanku waa rumaynta waxaadan u jeddin: sidaasuu mu'minku uga darajo sarreeyaa muslinka oo shanta tiir ee islaamka waa loo wada jeedaa: markuu qofku ash-haadanayo, markuu salaadda tukanayo, markuu zakada bixinayo, markuu soomayo iyo markuu xajka gudanayaba), Salaaddana oogaya. Oogiddu waa in salaadda lagu tukado si joogto ah waqtigeeda iyo xuduudeeda iyo arkaanteeda iyo sunankeeda iyo hay'aadkeeda oo loo dhammaystiro. Waa in salaadda xaqqeeda la siiyaa. Muttaqiintuna waa kuwa rizqiga aan siinnay wax ka sadaqaysta. Rizqi waxaa la yiraahdaa wax kasta oo qofka noloshiisa ka mid ah oo uu ku intafaaco oo waxtar ka helo, sida maalka, caruurta, cilmiga, qoyska, asxaabta iyo waxa la midka ahba(3)Muttaqiintu waana kuwa rumaynaya waxa adiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lagugu soo dejiyay, oo ah Quraanka, iyo waxa adiga hortaa lasoo dejiyay, sida Tawraadda**التوراة** iyo Injiilka**الإنجيل**, iyo kutubbada idil oo Anbiyada lagu soo dejiyay. Muttaqiintuna waa kuwa rumeeynaya maalinta aakhiro, looguna bixiyay inay addunka ka dambeyso, hubana inay imaaneyso(4)Kuwaasi, waana kuwa lixdaan calaamadood oo aan soo sheegnay laga helo, waxay yihiin hanuun korkiis uga yimid xagga Rabbigood, kuuwaasuna waa kuwa guulaystay, ahna kuwa ku badbaadaya gelidda Jannada, oo ah waxay doonayeen, kana badbaadaya Naarta oo ah waxay ka cararayeen. Adduunkaanna waxay ku leeyihiin khayr. Kuwaas ayuu Quraanku hanuun u yahay.(5)."

Sidaasuu kitaabkaan noogu dhammaaday, waxaanna ku gunaanadaynnaa annagoo leh:

الحمد لله رب العالمين وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيراكلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون.

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM
Watertown, South Dakota, USA
Talaado Maalinta Ciidu Al Adxaa ee sanadka kun afar boqol afar iyo soddon Hijriga una dhiganta shan iyo tobanka Oktoobar laba kun saddex iyo toban Miilaadiga.